MAJALADDA MARAG

Cadadka Tobanaad | Jan 2026

# AQOONSIGA SOMALILAND KADIB:

## MAXAA PUNTLAND LA GUDBOON?

Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)

Bogga: 20




Xigashada Sawirka: AI

# Qorayaasha Majaladda



**Cali Xaaji Warsame**
Burburka nidaamka caalamka, khilaafka siyaasadeed Iyo saameynta uu ku leeyahay soomaaliya 4



**Dr. Guuleed Saalax Barre**
Mustaqbalka Midnimada Soomaaliya: Casharro Taariikheed iyo Halisaha Maanta 7



**Farxaan Cabdirashiid**
Dimuqraadiyadda Soomaaliya: Burbur, Dib-u-dhis, iyo Mas'uuliyad Weli Taagan 10



**Ibraahiim Khaalid Maxamed**
Bulsho la illaaway: caqabadaha ay wajahayaan naafada soomaaliya 14



**Iman Jaamac**
Loollanka Quwadaha iyo Burburka Nidaamka Caalamiga ah: Xaggee Soomaaliya ka taagan tahay? 17



**Saki Rabiica**
Aqoonsiga Somaliland Kadib: Maxaa Puntland la Gudboon? 20



**Cabdullaahi Cabdi Dheere**
Ma La Gaaray Xilligii Soomaaliya Dib U Qeexi Lahayd Siyaasaddeeda Arrimaha Dibadda? 23



**Axmed Siciid Nuur**
Soomaaliya 25 Sano Ka Dib: Dhismaha Dowladnimada Saddexaad, Doorasho iyo Dastuur lagu muransan yahay - Q2 27



**Maxamed Nadiif Showkaani**
Qaran aan dib u fekerin ma badbaado 35



**Dr. Maxamed Cali Faarax**
Sida loo dhiso bulsho awood leh oo horumarsan: Aragti, iyo Casharro Caalami ah 38



**Maxamuud Cali Aadan (Hoorri)**
XILKU WAA KU DHIBAYAA! 42

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno cadadka tobnaad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed oo loogu talagalay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Cadadkani waa kii ugu horreeyay ee sannadka 2026. Sannadkii hore, waxaannu ku guulaysannay in aan soo saarno sagaal cadad, kaas oo ahaa sannadkii ugu horreeyay ee la aasaasay majaladda.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Akhristayaashu waxay cadadkan ka heli doonaan mowduucyo kala duwan, oo ay ka mid yihiin loollanka quwadaha waaweyn ee dunida maanta iyo saamaynta ay ku leeyihiin Soomaaliya; aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland; mustaqbalka midnimada Soomaaliya; xaaladda siyaasadda arrimaha dibadda ee Soomaaliya; 25 sano kadib geeddi-socodka dhismaha dowladnimada Soomaaliya; barbaarinta bulsho awood leh oo horumarsan; xaaladda dadka naafada ah ee Soomaaliya; iyo mowduucyo kale oo muhiim ah.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# BURBURKA NIDAAMKA CAALAMKA, KHILAAFKA SIYAASADEED IYO SAAMEYNTA UU KU LEEYAHAY SOOMAALIYA



**Ali Haji Warsame**
MA MBA CPA CGMA



**Xigashada Sawirka**: Garaadka macmalka ah (AI)

Burburkii nidaamka caalamiga ah ee ka dhashay ka bixitaanka dowladda Mareykanka in ka badan lixdan heshiisyo iyo ururro caalami ah, oo ay ku jiraan UNESCO, WHO iyo Paris Climate Accord, ayaa sababay in nidaamkii awoodda-baahansan ahaa ee dagaalka 2-aad ka dib la wiiqo. Go'aanka Madaxweyne Donald Trump ee ka-bixitaanka dowladda Mareykanka hay'adaha caalamiga ah waxa uu dunida ku riixay xaalad ay awoodda quwadaha waaweyn ay noqotay xeerka, taas oo si gaar ah u saameynaysa dalalka jilicsan oo ay ka mid tahay Soomaaliya. Dalalka nugul ee aan lahayn hay'ado adkaysi leh ayaa si toos ah u wajahaya cadaadis dibadeed iyo burbur gudaha ah, waxayna noqonayaan saaxadda lagu dagaalamayo ama laysku cayrsanayo.

Soomaaliya waxay la daalaa-dhacaysaa nuglaansho badan. Dhaqaale ahaan, dalka waxa uu leeyahay heer shaqo la'aan oo gaaraya ku dhawaad 67% dadkii shaqeyn karayey, halka dhallinyaradu ay ka yihiin in ka badan 70% bulshada. Tani waa khatar weyn oo aan u bixiyey "miino qarax-suge ah", maxaa yeealay dhallinyarada shaqo la'aanta ahi waxay u nugul yihiin in ay ku biiraan kooxaha xagjirka ah, ama dalka ka qaxaan oo u bareeraan khatarka tahriibka, ama ay ku wareegaan saboolnimo joogto ah. Ka bixitaanka USAID ee barnaamijyada gargaarka Soomaaliya oo ay ku tiirsanaayeen adeegyo farabadan sida adeegyada caafimaadka, waxbarashada iyo hay'adaha dowliga ah, wuxuu sii cusleeyey xaaladda nololeed ee boqolaal qof oo shaqaale ka ahaa hay'adahaas oo shaqadii laga fariisiyey.

Isla markaana, waxaa hadda socda xaddidaadda lacagaha xawaaladaha ah ee ay soo diraan qurba-joogta Soomaaliyeed ee dalka Mareykanka, iyadoo lagu soo rogey sharciyo qeexaya in qofka ceyrta qaata uusan wax xawaalad ah diri karin, iyo in canshuuro dheeraad ah oo gaaraya 1% waxa la dirayo lagu soo rogo dadka oo dhan, taasina waxay khatar dheeraad ah ku tahay ilaha ugu muhiimsan ee dakhliga qoysaska Soomaaliyeed. Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay soo diraan ku dhawaad $1.7-$2 bilyan dollar sanadkii, taasoo gaarta ku dhawaad 40% qoysaska Soomaaliyeed, isla markaana ka dhigaysa 17–20% dakhliga guud ee wax-soo-saarka dalka (GDP-Gross Domestic Product). Haddii la xaddido xawaaladaha dibadda ka imaanaya ee dadka iyo dalkuba ku tiirsanyihiin, dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu hoos u dhici karaa ku dhawaad shan meelood meel, taas oo sii kordhinaysa saboolnimada iyo xasilooni-darrada dalka.

Intaas haddii lagu daro xaaladda bani'aadamnimo ee sii adkaanaysa waxaa si weyn u kordhaya nuglaanshaha dalka. Roobabkii Deyrta ee sannadka 2025 ayaa aad u yaraa oo sidii la filayey u di'in, taas oo sababi karta in 4.5 milyan oo Soomaali ah ay noqdaan kuwo aan cunto ku filan haysan, una baahan gargaar degdeg ah, weliba haddii xilli-roobaadka Gu'ga oo ku aadan April-May uu sii daaho. Arrintaan waxay muujinaysa u-nuglaanshaha dalka ee isbeddelka cimilada. Soomaaliya waxa ay ku jirtaa dalalka ugu nugul is-bedelka cimilada caalamka iyo saameynteeda taban, iyadoo abaaro iyo fatahaado is-daba-joog ah ay burburiyeen wax-soo-saarka beeraha sanadihii la soo dhaafey, isla markaana ay barakiciyeen bulshooyin badan. Isku dhaca isbedelka cimilada iyo dowladnimada daciifka ah ayaa abuurtay xaalad adag oo bani-aadanimo, waxayna abaaruhu keenaan barakac, in loo soo qaxo magaalooyinka waaweyn, iyo xasilooni-darro amni iyo mid siyaasadeed. Haddii aan la helin taageero caalami ah oo joogto ah, Soomaaliya waxay halis ugu jirtaa xaalado macluul ah oo la mid ah kuwii dalka ka dhacay 1990-meeyadii.

Siyaasadda gudaha ee dalka iyo heshiis la'aanta siyaasadeed ayaa sidoo kale ah mid khatar ku jirta. Doorashada dowladda dhexe ee ku muddeysan dhammaadka muddo-xileedka ee dowladda uu madaxweynaha ka yahay mudane Xasan Shiikh Maxamuud ee May 2026 ayaa ku soo beegmeysa xilli kala-guur ah oo xasaasi ah. Soomaaliya waxa hadda ka jira muran xoogan oo ku aadan habraacyada doorashada dalka, dib-u-habaynta iyo wax-ka-bedel dastuurka oo aan lagu heshiinin iyo khilaafka u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, gaar ahaan Puntland iyo Jubbaland.

Khilaafaadka joogtada ah ee u dhexeeya Muqdisho iyo maamul-goboleedyada ayaa curyaamiyey go'aan qaadashadii dalka, halka musuqmaasuqa iyo eexdu ay Soomaaliya ku hayaan booska ugu hooseeya sida ay sheegtay Hay'adda Transparency International, oo ay iyada iyo Koonfurta Suudaan ku kala kaltamaan halka ugu hooseeysa. Hoggaanka Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud ayaa lagu dhaliilayaa in uu aad isugu deyay in uu awoodda dowladnimada ku ururiyo gacantiisa, isla markaana uu ku guuldareystay dhisidda is-afgarad bulshadeed iyo mid maamul, taas oo keeni karta khatar xaga sharciyadda ah haddii doorashooyinka la qabto iyadoo aan la helin heshiis bulshadeed oo ballaaran. Dhinac kasta oo laga eego, kalsooni-darrada shacabka iyo kala qaybsanaanta siyaasiyiinta ayaa khatar ku ah midnimada qaranka.

Waxaa taas ka sii daran faragelinta dibadda oo sii murgineysa xaaladda. Aqoonsiga Israa'iil ee

gooni-isu-taagga goboladda Waqooyi-Galbeed ee Soomaaliya ee loo yaqaan Somaliland ayaa caqabad ku ah midnimada dhuleed ee Soomaaliya, inkasta oo ururrada caalamiga ah sida Golaha Qaramada Midoobey (UN), Ururka Midnimada Afrika (AU), kan Jaamacadda Carabta iyo kan Dowladaha Islaamka ah (OIC) ay si cad u taageereen madaxbannaanida iyo midnimada dhuleed ee Soomaaliya. Go'aankan waxa uu leeyahay saameyn istiraatiiji ah oo ku aadan Geeska Afrika, halkaas oo Soomaaliya ay ku taallo marin-badeed muhiim ah oo ku dhow Gacanka Cadmeed iyo Badda Cas, oo ah marinnada ganacsiga ee caalamiga ah. Xasilooni-darrada Soomaaliya waxay khatar ku tahay amniga badda, ganacsiga adduunka, iyo xasilloonida dalalka deriska ah sida Itoobiya iyo Kenya. Dalalka Khaliijka, Turkiga, Shiinaha iyo quwadaha reer galbeedka ayaa hore ugu tartamayey Geeska Afrika, taas oo saameynteeda ku yeelatay deganaanshaha dalka, burburka gudaha ee Soomaaliyana wuxuu siinayaa dalalkaas fursad ay ku kala baxaan.

Marka la soo koobo, isku-dhaca nuglaanshaha dhaqaale ee dalka, xaaladda adag ee xaga arrimaha bani'aadamnimada ee ka dhalatey roob-yaraanta iyo abaaraha, kala- qaybsanaanta siyaasadeed, iyo faragelinta dibadda ayaa Soomaaliya gelinaya meel halis ah, kana dhigaya masrax lagu dul dalaagamo. Horaa loo yiri "meeshii labo maroodi ku hardamaan cawskaa ku baaba'a". Haddii ay taas u raacdo lacagaha xawaaladaha oo la xaddido, dhaqaalaha Soomaaliya oo ku tiirsan taas ayaa burburi kara. Haddii murannada doorashada aan la xallin sida ugu degdeg badan oo aan la qaban doorasho heshiis lagu yahay, sharciyadda ayaa ku lumeysa. Haddii khilaafaadka ragaadiyey xiriirka dowladda federaalka ah iyo dowlad-goboleedyada ay sii socdaan, hay'adaha dowladnimada ayaa sii daciifaya. Haddii abaaraha iyo fatahaadaha biyuhu ay sii socdaan, cuntada ayaa yaraaneysa ama dad badan oo ku tiirsan nolosha xoolaha iyo beeraha ayaa noloshoodu halis galeysaa.

Haddii aan la helin wadahadal wax-dhis ah, oo daacad laga yahay, kaas oo u dhexeeya dowladda federaalka iyo mucaaradka, Soomaaliya waxay wajahaysaa khatar ku saabsan jiritaankeeda, amnigeeda, iyo midnimadeeda dhuleed. Taageerada caalamiga ah iyo kalsoonida dowladnimada dalkuna way sii wiiqmeysaa, waxaana meesha ka baxaya rajadii aheyd inay Soomaaliya tahay dal ka soo kabtay burburkii, leh dowladnimo han-qaadeysa, leh hogaan ka heshiin kara khilaafaadkooda, taas oo ah xalka keliya ama dariiqa keliya ee looga hortagi karo burburka. Waa in masiirka ummadda Soomaaliyeed ay ka go'do dadkeeda, ee aysan noqon arrin caalami ah oo ka baxsan xuduudaheeda.

Waxaa intaas raaca, khataraha ka baxsan xuduudaha Soomaaliya iyo xasillooni-darrada Muqdisho waxay saamayn ku leedahay Geeska Afrika oo dhan, gaar ahaan dalalka deriska la ah Soomaaliya sida Itoobiya iyo Kenya, kuwaas oo u jilicsan fowdo kasta oo ka timaada deriskooda, isla markaana carqaladaynaysa ganacsiga marin-badeedka Gacanka Cadmeed, Badda Cas iyo Baabul-mandab. Dhibaato kasta oo ku habsata Soomaaliya waxay ka dhigan tahay musiibo qaran, caqabad goboleed iyo mid caalami ah oo u baahan fiiro degdeg ah oo ka timaadda siyaasiyiinta, aqoonyahannada, iyo waxgaradka kale ee dalka. Casharrada taariikhdu waa cad yihiin: marka dowladaha jilicsan ay burburaan, cawaaqibka ka dasha ayaa ka gudubta xuduudahooda.

Jid-gooyadda ay hadda taagan tahay Soomaaliya ma go'aamin doonto masiirkeeda oo keliya, balse wuxuu saamayn ku yeelan doonaa xasilloonida guud ee gobolka oo dhan, kaas oo ku yaalla isgoys ay wadaagaan Afrika, Bariga Dhexe, iyo ganacsiga caalamiga ah. Dalalka gobolka ee maanta ku faraxsan kala-qaybsanaanta Soomaaliya iyo gooni-isu-taagga Somaliland, ha ahaadaan Afrikaan ama Carab, ugu dambayn waxaa gubi doona isla qalalaasaha ka dasha arrintan haddii aysan hadda ku dadaalin daminta dabka colaadda.

W/Q: Cali Xaaji Warsame

**Tix-raac:**


1. Hiiraan Online – Somalia's 2026 election risks a legitimacy crisis (Dec 2025).
2. World Bank – Somalia Economic Update (2025).
3. World Bank – Migration and Remittances Data (2025); FAO – Household Food Security Survey Somalia (2025); IMF – Somalia Country Report (2025).
4. OCHA – Somalia Humanitarian Needs Overview (2025).
5. UNEP – Climate Vulnerability Index (2025).
6. Transparency International – Corruption Perceptions Index (2025).
7. Al Jazeera – Israel's Recognition of Somaliland (2025); Chatham House – Horn of Africa Geopolitics (2025).

# MUSTAQBALKA MIDNIMADA SOOMAALIYA:

## CASHARRO TAARIIKHEED IYO HALISAHA MAANTA



Dr. Guuleed Saalax Barre




**Xigashada Sawirka**: AI

# TAXANAHA: DAL IYO DAD

Dal iyo Dad waa taxane maqaallo joogto ah oo bil walba ku soo bixi doona Majalladda Marag, kaas oo si qoto dheer u falanqeynaya mawduucyo la xiriira dowladnimada, federaalka iyo taariikhda Soomaaliya. Taxanahani wuxuu isku xirayaa waayo-aragnimo taariikheed, aragti cilmiyeed iyo duruufaha siyaasadeed ee taagan, isaga oo ujeedkiisu yahay in la helo faham qoto dheer oo ka turjumaya casharrada taariikhda, dhismaha dowladnimo casri ah, iyo kaalinta muwaadinka ee masiirka qaranka. Sidoo kale, Dal iyo Dad wuxuu dhiirrigelinayaa dood aqooneed, wacyigelin bulsho iyo kobcinta aragti fog oo ku wajahan mustaqbalka dalka.

Midnimadu waa udub-dhexaadka dowladnimo kasta, waa xudunta isku haysa dhul, dad iyo hay'ado, isla markaana dejisa jihada uu qaran u socdo. Cilmiga siyaasadda wuxuu muujinayaa in midnimada qaran aysan ahayn xaalad dabiici ah oo iskeed u waarta, balse ay tahay mashruuc siyaasadeed oo si miyir leh loo dhiso, loo ilaaliyo, loona kobciyo. Taariikh ahaan, marka hoggaan qaran ku guuldarreysto ilaalinta iyo xoojinta midnimada, dowladnimadu waxay u nuglaataa burbur hay'adeed, kala firdhid bulsho iyo faragelin shisheeye. Midnimo dhab ah waxay u baahantahay hoggaan leh aragti qaran, hay'ado shaqeeya, iyo heshiis bulsho oo qeexaya xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka iyo dowladnimada.

Xaaladda Soomaaliya waxay si cad u muujinaysaa sida fashilka hoggaamineed uu u wiiqi karo midnimada qaran, una horseedi karo bulsho wadaagta af, diin iyo dhaqan inay ku kala irdoobaan dano isdiidan iyo aragtiyo siyaasadeed oo iskhilaafsan. Halkii sifooyinkaas wadajirka ahi noqon lahaayeen saldhig dowladnimo adag, waxaa marar badan lagu beddelay aalado lagu kala fogeeyo bulshada, taas oo si joogto ah u dhaawacday kalsoonidii qaran.

## 1. CASHARRADA TAARIIKHDA: FURSADO LUMAY

Dowladdii Soomaaliyeed ee xornimada ka dhalatay 1960-kii waxay ku bilaabatay rajo iyo taageero bulsho oo ballaaran. Si kastaba ha ahaatee, hoggaamiyeyaashii rayidka ahaa ee xilligaas waxay ku fashilmeen dhismaha hay'ado waara, nidaam maamul oo hufan iyo caddaalad siyaasadeed. Musuq, eex iyo tartan dano gaar ah ku saleysan ayaa hoos u dhigay sharciyaddii dowladnimada, taas oo ugu dambayn sababtay burburkii nidaamkii rayidka ahaa.

Nidaamkii millatari ee xigay wuxuu ku yimid ballanqaad midnimo iyo sinnaan, balse midnimadii la sheegay waxay noqotay mid ku dhisan awood qasab ah. Kala aragti duwanaanshihii waa la cabburiyay, awoodduna hal gacan ayay ku aruurtay. Markii nidaamkaasi burburay 1991-kii, waxaa si cad u muuqday in midnimo aan ku dhisnayn heshiis bulsho ay si degdeg ah u dunto marka awooddu lunto. Burburka dowladda dhexe ka dib, Soomaaliya waxay gashay marxalad dowlad la'aan ah, firaaq siyaasadeed iyo burbur hay'adeed oo baahsan, taas oo sii xoojisay kala qaybsanaantii bulsho illaa ay Gobollada Waqooyi Galbeed (Somaliland) ku dhawaaqeen gooni-isu-taag.

Dowladihii xigay laga soo bilaabo 2000, inkastoo ay abuureen rajooyin dib-u-dhis iyo hirgelinta hannaan federaal ah, haddana waxay ku fashilmeen dhismaha hay'ado mideeya dalka iyo gaarista heshiis bulsho oo sal adag leh. Natiijadu waxay noqotay in Soomaaliya wali aysan yeelan dastuur rasmi ah, dowlad-dhiskuna ku tiirsanaado xalal ku-meel-gaar ah, heshiisyo kooban iyo qaybsiga awoodda, halkii laga dhisi lahaa nidaam caddaalad iyo midnimo ku dhisan.

## 2. HOGGAANKA HADDA JIRA: DAYAC QARAN

Hoggaanka hadda jira wuxuu kusii socday dhabbihii hore iyo ka daran. Waxay ku guuldarreysteen xoojinta midnimada qaranka, gaar ahaan dhinacyada heshiisiinta bulshada, wadahadalka Somaliland, dhammaystirka dastuur heshiis lagu yahay iyo ilaalinta wadajirka siyaasadeed iyo bulsho. Halkii laga filayay mudnaan gaar ah oo la siiyo midnimada qaranka, waxaa muuqata siyaasad ku dhisan muran joogto ah, kala shakiga hay'adaha dowladeed, iyo go'aanno aan ku dhisnayn wadatashi dhab ah.

Wadahadalladii u dhexeeyay Dowladda Federaalka iyo Somaliland lama siin mudnaantii istiraatiijiyadeed ee ay lahaayeen, mana helin hoggaan leh aragti iyo ajande cad. Taasi waxay sii fogeysay kala fogaanshaha siyaasadeed, iyadoo xaaladdu gaartay heer ay quwado shisheeye qaarkood bilaabeen tallaabooyin wax u dhimaya wadajirka dhuleed ee Soomaaliya.

Arrin kale oo si weyn u wiiqay midnimada ayaa ah qaabka loo wajahay wax-ka-beddelka dastuurka. Dastuurku waa heshiis bulsho, mana noqon karo mid sharciyad leh haddii aan lagu dhisin wadatashi ballaaran iyo oggolaansho guud. Sidoo kale, khilaafaadka siyaasadeed ee joogtada noqday ayaa sababay in dowladnimada marar badan loo adeegsado ciqaab wadareed, iyadoo adeegyada iyo mashaariicda

horumarineed lagu xiro mowqif siyaasadeed, taas oo dhaawacday kalsoonidii bulshada siina hurisay kala qaybsanaantii jirtay.

## 3. FARAGELINTA SHISHEEYE: NATIIJADA HOGGAAN DACIIF AH

Faragelinta shisheeye inta badan waa natiijo ka dhalata daciifnimo gudaha ah iyo hoggaan ku guuldarreystay dhismaha midnimo qaran iyo hay'ado sal adag leh. Marka hoggaanku ku fashilmo mideynta bulshada, dejinta aragti qaran oo cad iyo ilaalinta heshiiska bulsho, wuxuu abuuraa firaaq siyaasadeed iyo amni oo ay si fudud u buuxiyaan quwadaha dibadda. Sidaas awgeed, faragelinta shisheeye ma timaaddo si lama filaan ah, balse waxay ka faa'iideysataa kala qaybsanaan gudaha ah iyo hoggaan aan isku filnayn.

Xiriirka dibadda ee macnaha leh kuma dhismo ku-tiirsanaan ama is-dabamarin, balse wuxuu ku dhisan yahay is-weydaarsi dano, ixtiraam labada dhinac ah iyo saaxiibtinimo siyaasadeed oo lagu kalsoonaan karo. Dal leh aragti qaran iyo bulsho ku mideysan danaha guud, wuxuu si sahlan u dhistaa saaxiibo siyaasadeed oo garab istaaga marka danaha qaranku halis galaan. Hase yeeshee, hoggaanka Soomaaliya ee maanta wuxuu ku fashilmay dhismaha xiriir dibadeed oo waxtar u leh qaranka, taas beddelkeedna wuxuu qaaday jihooyin is-beddelaya oo ku saleysan dano dhow. Taasi waxay keentay in Soomaaliya loo arko dal aan lahayn saaxiibo dhab ah, isla markaana aan lagu kalsoonaan karin jihada siyaasaddiisa, taas oo sii xoojisay faragelinta shisheeye iyo kala qaybsanaanta gudaha.


## GUNAANAD IYO TALOOYIN

Gunaanad ahaan, waxaa cad in caqabadaha ku hareeraysan midnimada Soomaaliya aysan ahayn kuwo ku yimid si lama filaan ah ama ka dhashay kala duwanaansho bulsho, balse ay yihiin natiijo toos ah oo ka dhalatay fashil hoggaamineed, heshiis bulsho oo la dayacay iyo dowladnimo ku tiirsan xalal ku-meel-gaar ah. Laga soo bilaabo xornimadii 1960 ilaa burburkii 1991 iyo marxaladda federaalka ee maanta, waxaa si joogto ah u fashilmay in midnimada qaranka loo beddelo sharci, hay'ado adag iyo kalsooni bulsho oo waarta.

Hoggaanka maanta jira kama faa'iidaysan casharradii taariikhda, balse wuxuu kusii socdaa waddo ay ka muuqdaan khilaaf siyaasadeed, go'aanno aan ku dhisnayn wadatashi qaran iyo dayaca heshiisiinta bulsho. Taasi waxay sii wiiqday wadajirka qaranka, waxayna Soomaaliya ka dhigtay dal nugul oo ku dhex milmay loollan shisheeye, isla markaana la ildaran jiho iyo saaxiib-la'aan siyaasadeed. Xilligan oo doorashooyin la wajahayo, hoggaanka waxaa laga doonayaa inuu dhulka dhigo ajandayaasha halka dhinac ah, xoogana saaro midnimo gudaha ah, heshiis siyaasadeed oo loo dhan yahay iyo hannaan doorasho oo la isku raacsan yahay, si looga hortago qalalaase cusub.

Dhanka kale, dib-u-dhiska midnimadu ma hirgeli karo haddii aan si dhab ah loo wajihin heshiisiin bulsho, dastuurkana loo arkin heshiis qaran oo lagu saleeyo wadatashi iyo oggolaansho guud. Midnimada qarankuna waa mas'uuliyad wadaag ah, shacabka Soomaaliyeed waa inay iska garabsadaan ilaalinta wadajirka dalkooda, kana hortagaan kala goyn kasta. Ugu dambayn, mustaqbal xasilloon wuxuu ku xiran yahay hoggaan aragti fog leh, muwaadin wacyi leh, iyo siyaasad dibadeed ku dhisan dano is-weydaarsi iyo saaxiibtinimo siyaasadeed oo la isku halayn karo.

**W/Q:** Dr. Guuleed Saalax Barre



# DIMUQRAADIYADDA SOOMAALIYA:
## BURBUR, DIB-U-DHIS, IYO MAS'UULIYAD WELI TAAGAN



Farxaan Cabdirashiid Sugulle (Xaabsey)

**Xigashada Sawirka**: AI



# HORDHAC

Dimuqraadiyaddu waa nidaam maamul oo ku dhisan rabitaanka shacabka, xorriyadda fikirka, isla xisaabtanka, iyo in talada lagu kala wareego si nabad ah. Bulsho kasta oo doonaysa horumar siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho waxay u baahantahay dimuqraadiyad dhab ah oo ka tarjumaysa codka muwaadiniinta. Soomaaliya, dimuqraadiyaddu waxay weli ku jirtaa marxalad dhisme, iyadoo ay jiraan caqabado iyo fursado labadaba.

# MACNAHA DIMUQRAADIYADDA

Ereyga dimuqraadiyad (Democracy) wuxuu asal ahaan ka yimid laba eray oo Giriig ah: Demos (shacab) iyo Kratos (xukun). Sidaas darteed, dimuqraadiyaddu waa xukunka shacabka. Waxay ku dhisantahay doorashooyin xor iyo xalaal ah, xukun sharciga, ilaalinta xuquuqda aadanaha, iyo xorriyadda hadalka iyo saxaafadda.

# TAARIIKH KOOBAN DIMUQRAADIYADDA SOOMAALIYA (1960–1991)

Soomaaliya waxay xorriyaddeeda qaadatay 1-dii Luulyo 1960-kii, markaas oo ay midoobeen gobolladii Waqooyi iyo Koonfur, lana aasaasay Jamhuuriyadda Soomaaliya. Xilligii u dhexeeyay 1960 ilaa 1969-kii, dalka wuxuu ku dhaqmayay nidaam dimuqraadiyadeed oo baarlamaani ah, iyadoo la qabtay doorashooyin xisbiyo badan ah, lana dhisay hay'ado dowladeed oo ku dhisan dastuurkii 1960-kii.

Mudadaas, inkastoo ay jirtay xorriyad siyaasadeed iyo saxaafadeed, haddana waxaa soo baxayay dhibaatooyin ay ka mid ahaayeen musuqmaasuq, qabyaalad siyaasadeed, iyo xasillooni darro xagga dowladnimada ah. Arrimahaas ayaa wiiqay kalsoonidii shacabka ee nidaamka dimuqraadiyadda.

21-kii Oktoobar 1969-kii, waxaa dhacay afgembi militari oo uu hoggaaminayay Janaraal Maxamed Siyaad Barre, kaas oo meesha ka saaray nidaamkii dimuqraadiyadeed, loona beddelay talis milatari oo ku dhisan hal xisbi. Xorriyaddii siyaasadeed waa la joojiyay, xisbiyadii waa la mamnuucay, awoodduna waxay ku ururtay gacanta dowladdii dhexe.

Inkasta oo taliskii milatarigu hirgeliyay barnaamijyo horumarineed iyo ololeyaal wacyigelin ah, haddana muddo kadib waxaa soo kordhay cadaadis siyaasadeed, ku takri-fal awood, iyo dagaallo sokeeye oo salka ku haya qabyaalad iyo mucaarad hubeysan.

Ugu dambeyn, 1991-kii, taliskii militariga ayaa burburay, taas oo horseedday in ay dhacdo dowladdii dhexe, isla markaana dalku galo fowdo, dagaallo sokeeye iyo kala dambeyn la'aan. Burburkaas wuxuu soo afjaray marxaladihii hore ee dimuqraadiyadda Soomaaliya, wuxuuna bilaabay xilli cusub oo caqabado adag leh.

# DIMUQRAADIYADDA SOOMAALIYA 1991–2026

Kadib burburkii dowladdii dhexe ee 1991-dii, Soomaaliya waxay gashay marxalad adag oo fowdo, dagaallo sokeeye, iyo kala dambeyn la'aan ah. Waxaa meesha ka baxay dhammaan hay'adihii dowladeed, iyadoo awooddu ku dhacday gacanta hoggaamiye-kooxeedyada hubeysan. Muddo ku dhow toban sano, dalku ma lahayn dowlad dhexe oo shaqeysa, taas oo si weyn u hakisay horumarkii dimuqraadiyadda.

Intii u dhexeysay 2000–2004-tii, waxaa la sameeyay dadaallo dib-u-heshiisiin oo caalami ah, kuwaas oo horseeday dhismaha Dowladdii Ku-meelgaarka ahayd (TNG) sanadkii 2000, kadibna Dowladdii Federaalka Ku-meelgaarka ahayd (TFG) sanadkii 2004. Inkastoo dowladahani ay ahaayeen kuwo ku-meelgaar ah, haddana waxay ahaayeen tallaabooyin muhiim ah oo loo qaaday dhanka dib-u-dhiska dowladnimada iyo soo celinta hay'adaha dastuuriga ah.

Sanadkii 2012, Soomaaliya waxay gashay marxalad cusub markii la ansixiyay Dastuur Ku-meelgaar ah, lana dhisay Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS). Taas ayaa calaamad u ahayd dhammaadka xilliga ku-meelgaarka iyo bilowga hannaan dowladeed oo rasmi ah. Waxaa la doortay madaxweynayaal, baarlamaan, iyo dowlado xubno ka ah federaalka, inkastoo doorashooyinku badankood ku dhisnaayeen nidaamka qabiilka (4.5), halkii ay ka ahaan lahaayeen cod dadweyne.

Intii u dhexeysay 2012–2026, waxaa jiray horumarro iyo caqabado is barbar socda. Waxaa la xoojiyay hay'adaha dowliga ah, sare loo qaaday wacyiga bulshada ee dimuqraadiyadda, lana ballaariyay doorka warbaahinta iyo bulshada rayidka ah. Dhanka kale, caqabado waaweyn sida amni darrada, musuqmaasuqa, khilaafaadka siyaasadeed, iyo dib-u-dhaca doorashooyinka qof iyo cod ah ayaa weli hor taagan hirgelinta dimuqraadiyad buuxda.

2026, Soomaaliya weli waxay ku jirtaa marxalad kala-guur ah oo u dhaxaysa nidaam ku dhisan saami-qabiil iyo rajo ku aaddan dimuqraadiyad ku saleysan codka shacabka. Guusha mustaqbalka dimuqraadiyadda Soomaaliya waxay ku xirnaan doontaa xoojinta amniga, dhammaystirka dastuurka, hirgelinta doorashooyin qof iyo cod ah, iyo masuuliyadda siyaasiyiinta iyo wacyiga shacabka.

## DOORKA SIYAASIYIINTA SOOMAALIYEED EE HIRGELIN LA'AANTA DIMUQRAADIYADDA

1. Khilaafaadka Siyaasadeed ee Qabiilku Ku Salaysan
    - Siyaasiyiintu mararka qaar waxay danahooda gaarka ah ka hormariyaan danaha qaranka.
    - Kala qaybsanaanta qabiilka iyo kooxaha siyaasadeed ayaa sabab u noqda dib u dhac doorasho iyo xasilooni la'aan siyaasadeed.
2. Xoogsiinta Xukunka iyo Tartanka Awoodda
    - Siyaasiyiinta qaar waxay ku dadaalaan in ay xukunka xoog ku joogaan, halkii ay ku abuuri lahaayeen nidaam hufan.
    - Tartanka siyaasadeed ee aan cadaaladda ku dhisnayn wuxuu keenaa musuqmaasuq, eex, iyo in codka shacabka lagu takrifalo.
3. Ka Fogaanshaha Hufnaanta iyo Daahfurnaanta
    - Siyaasiyiinta qaarkood ma taageeraan hay'ado madax-bannaan sida guddiyada doorashooyinka iyo maxkamadaha.
    - Taas waxay sababtaa in doorashooyinka aysan u dhicin si caddaalad ah, iyo in shacabka aysan ku kalsoonaan nidaamka dimuqraadiyadeed.
4. Dib u Dhaca Hirgelinta Doorashooyinka Tooska ah
    - Sababo siyaasadeed dartood, doorashooyinka dadweynaha tooska ah weli ma dhicin Soomaaliya.
    - Siyaasiyiinta qaarkood waxay ka doorbidaan doorashooyin dadban ah, si ay u sii haystaan awooda iyo saamaynta siyaasadeed.
5. Ku Faa'iideysiga Nidaamka Qabiilka
    - Siyaasiyiintu qaarkood waxay ka faa'iidaystaan nidaamka qabiilka iyo ergooyinka, taasoo ka hortagta dimuqraadiyad buuxda.
    - Arrintani waxay yaraynaysaa ka qaybgalka shacabka iyo sinnaan siyaasadeed.

## CAQABADAHA HORTAAGAN HIRGELINTA DIMUQRAADIYADDA SOOMAALIYA

Dimuqraadiyadda Soomaaliya waxaa hortaagan caqabado waaweyn oo saameyn ku leh hirgelinteeda iyo xasilloonideeda. Caqabadahaas waxaa ka mid ah:

1. Amni darro joogto ah: Weerarro hubeysan, argagixiso, iyo colaad sokeeye ayaa caqabad weyn ku ah qabashada doorashooyin xor iyo xalaal ah.
2. Qabyaalad iyo saami-qabiil: Nidaamka 4.5 iyo ku tiirsanaanta qabiilka ayaa wiiqaya mabda'a sinnaanta iyo codka muwaadinka.
3. Hay'ado dowladeed oo daciif ah: Garsoor aan madax-bannaanayn, sharci fulin liidata, iyo maamul xumo ayaa dhaawacaya kalsoonida shacabka.
4. Musuqmaasuq baahsan: Ku takrifalka hantida dadweynaha iyo awoodda siyaasadeed ayaa carqaladeynaya isla xisaabtanka.
5. Aqoondarro siyaasadeed: Qaybo badan oo bulshada ka mid ah ma ay haystaan wacyi ku filan oo ku saabsan xuquuqdooda dimuqraadiyadeed.
6. Khilaafaad siyaasadeed: Isfahan la'aanta u dhexeysa dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada ayaa dib u dhigta horumarka dimuqraadiyadda.
7. Faragelin dibadeed: Saameynta dalal shisheeye iyo dano gaar ah ayaa mararka qaar wiiqa go'aan-qaadashada madax-bannaan.

## FURSADAHA DIMUQRAADIYADDA SOOMAALIYA IYO DOORASHOOYINKA 2026: DOORKA SIYAASIYIINTA

1. Hirgelinta Doorasho Dadweyne ama Dadban
    - Doorashooyinka 2026 waxaa loo diyaarin karaa in ay noqdaan doorasho dadweyne toos ah ama doorasho dadban (indirect).
    - Siyaasiyiintu waxay kaalin weyn ka ciyaaraan dejinta habka doorashada, shuruucda, iyo nidaamka ka qaybgalka bulshada.
2. Xoojinta Nidaamka Dimuqraadiyadda
    - Siyaasiyiintu waxay ka qaybqaatan xoojinta

baarlamaanka, guddiyada doorashooyinka, iyo hay'adaha madax-bannaan.

- Tani waxay hubisaa in doorashooyinka 2026 ay noqdaan kuwo cadaalad iyo hufnaan ku dhisan.

3. Ka Qaybgalka Bulshada Rayidka iyo Dhallinyarada

- Siyaasiyiintu waa inay dhiirrigeliyaan ka qaybgalka dhalinyarada, haweenka, iyo ururada bulshada rayidka ah.
- Tani waxay sare u qaadaysaa cadaaladda iyo matalaadda shacabka.

4. Ka Hortagga Musuqmaasuqa iyo Xoogsiinta Hufnaanta

- Siyaasiyiintu waa inay noqdaan kuwo tusaale u ah hufnaanta, isla markaana ay ka shaqeeyaan ka hortagga musuqmaasuqa iyo eexda doorashooyinka.
- Doorashooyinka 2026 waxay fursad u noqon karaan in la muujiyo daahfurnaan siyaasadeed iyo kalsoonida shacabka.

5. 5. Ka Faa'iideysiga Khibradaha Hore

- Doorashooyinkii hore iyo nidaamyadii TNG, TFG, iyo federaalka waxay siyaasiyiinta siiyaan casharro muhiim ah oo lagu hagaajin karo nidaamka.
- Khibraddan waxay ka caawinaysaa yareynta qaladaadka iyo horumarinta dimuqraadiyadda.

6. Taageerada Beesha Caalamka iyo Tiknooloojiyadda

- Siyaasiyiintu waxay ka faa'iidaysan karaan tababaro, kormeer, iyo tiknooloojiyada casriga ah si doorashooyinka 2026 ay u noqdaan kuwo hufan.

### Tiknooloojiyada casriga ah waxay fududeyn kartaa kormeerka, codbixinta elektaroonigga ah, iyo daahfurnaanta.

Dimuqraadiyadda Soomaaliya: Casharro laga baran karo dalalka ka soo kabtay marxalado la mid ah una tallaabay horumar

Dimuqraadiyadda Soomaaliya waxay soo martay marxalado adag tan iyo burburkii dowladdii dhexe 1991. Colaado sokeeye, kala-qoqob siyaasadeed, faragelin shisheeye iyo nidaam beeleed ku dhisan awood-qaybsi ayaa caqabad ku noqday hirgelinta dimuqraadiyad dhab ah. Si kastaba ha ahaatee, taariikhda caalamka waxaa ka jira waddamo soo maray duruufo la mid ah kuwa Soomaaliya, balse ku guuleystay inay noqdaan wadamo horumarsan oo xasilloon.

**Waddamo tusaale u ah ka soo kabashada**

1. **Rwanda:** Ka dib xasuuqii 1994-tii, Rwanda waxay wajahday burbur siyaasadeed iyo bulsho, iyadoo xoogga la saaray dib-u-heshiisiin, amni, iyo dowlad hufan, Rwanda maanta waa dal leh xasillooni, koboc dhaqaale iyo hay'ado shaqeeya; inkastoo dimuqraadiyaddeedu weli dood ka taagantahay.
2. **Liberia:** Dagaallo sokeeye oo daba dheeraaday kadib Liberia waxay ku tallaabsatay doorashooyin xor ah, dib-u-habayn hay'adeed, iyo taageero caalami ah. Tani waxay u suurtagelisay in dalka uu helo xasillooni siyaasadeed iyo dib-u-dhis tartiib tartiib ah.
3. **Sierra Leone:** Dagaalkii sokeeye kadib Sierra Leone waxay xoogga saartay dib-u-heshiisiin qaran, la-dagaallanka musuqmaasuqa, iyo doorashooyin joogto ah. Maanta waa dal leh nidaam dimuqraadi ah oo shaqeynaya marka loo eego duruufihii hore.
4. **South Africa:** Inkastoo aysan ahayn dal burburay sida Soomaaliya, South Africa waxay ka soo baxday nidaam midab-takoor (Apartheid) iyadoo adeegsatay wada-hadal, dastuur loo dhanyahay, iyo hay'ado dimuqraadi ah oo xooggan taas oo cashar weyn u ah bulshooyin kala qaybsan.

## CASHARRO AY SOOMAALIYA KA BARAN KARTO

- Dib-u-heshiisiin dhab ah: Nabadda iyo dimuqraadiyaddu ma shaqeeyaan haddii aan la helin kalsooni bulsho.
- Dowladnimo ku dhisan hay'ado: Ka guurista shaqsiyaad iyo beelo loona guuro hay'ado sharci iyo dastuur ku dhisan.
- Doorashooyin daahfuran: Ka tarjumaya rabitaanka shacabka, si tartiib ahna uga gudbaya nidaamka ku-meelgaarka ah.
- La-dagaallanka musuqmaasuqa: Maamul hufan ayaa ah laf-dhabarta horumar kasta.
- Ka-qaybgalka dhalinyarada iyo haweenka: Xoogga cusub ee bulshada waa furaha mustaqbalka.

**W/Q:** Farxaan Cabdirashiid Sugulle (Xaabsey)

# BULSHO LA ILLAAWAY:

## CAQABADAHA AY WAJAHAYAAN NAAFADA SOOMAALIYA



Ibraahiim Khaalid Maxamed



# HORDHAC

Naafo waa magac loo adeegsado bulshada kuwooda aan lexaadkoodu dhammaystirnayn.

Sida ku xusan hishiiska xuquuqaha naafada ee Qaramada Midoobey: naafo waa ciddii la nool waqti dheer dhibaato jireed ama maskaxeed, taas oo ka hor istaagaysa inay si dhammaystiran uga qaybqaataan dhammaan dhinacyada nolosha.

Naafadu waa qayb weyn oo kamid ah bulshada caalamka, waxaana lagu qiyaasaa in kabadan 15% dadka caalamka. Naafada caalamku way ku kala duwanyihiin duruufaha ay la noolyihiin.

Tusaale ahaan, marka la eego adeegyada ay helaan: wadamada Sweden, Norway iyo Canada ayaa loo tixgeliyaa inay yihiin waddammada ugu sarreeya oo uu qof naafo ahi ku noolaan karo caalamka, sidaa darteed la mid maaha waddammada Afrika oo intooda badan aysan naafadu wax tixgalin ah ku lahayn.

# NAAFADU WAX MA QABAN KARAAN?

Sida ay nooga marag kacayso taariikhdu dadka naafada ahi hadday xal u helaan caqabadaha ay la kulmaan waa curiyeyaal iyo aqoonyahanno wax ku soo kordhin kara bulshada ay la noolyihiin, tusaalayaal nool oo aan soo qaadan karno waxaa ka mid ah:

Helen Keler 1880–1968 waxay ahayd gabadh aragga iyo maqalkaba la'; balse waxay noqotay qoraa iyo macallimad u doodda xuquuqda naafada.

Franklin Rosefelt 1882–1945 inuu ahaa curyaan kama hor istaagin in uu hormar gaaro, wuxuu noqday madaxweynaha 32-aad ee Maraykanka, kaas oo ka saaray dagaalkii labaad ee adduunka.

Sheikh Cabdul-casiis Ibnu Baaz 1912–1999 waxa uu arag beelay isaga oo yar, hase ahaatee waxa uu ku dadaalay barashada Diinta illaa uu noqday Muftiga guud ee dowladda Sucuudiga, iyo mid kamid ah culimadii ugu waawaynayd qarnigii 20-aad. Tusaalayaashaas oo dhammi waxa ay ka marag kacayaan in naafadu qaban karto wax kasta shaqo tan ugu sarraysa haddii ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

# CAQABADAHA AY LANOOL YIIHIIN NAAFADA SOOMAALIYA

Dowladda Soomaaliya waxa ay kamid tahay dowladaha saxiixay heshiiska caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada ah (UNCRBD), sida ku xusan heshiiska dowladdii saxiixda waxaa laga doonayaa inay ilaaliso xuquuqda naafada waxna u qabato, hase ahaatee ma jirto tillaabo taas muujinaysa oo dowladda Soomaaliya qaaday tan iyo markay hishiiskaas ku biirtay.

Caqabadaha ay wajahayaan naafada Soomaaliya waxaa ka mida:

1. **Adeeg la'aan:** Naafada Soomaaliya ma ay helaan adeegyo dhammaystiran sida: adeegyo waxbarasho, caafimaad ama fursado dhaqaale abuur.

   Waxbarashada naafada Soomaaliya weli waa mid gaar ah (Special Education), oo ma gaarsiisana sida waddammada dariska ah oo ay naafadu wax la bartaan dadka aan naafada ahayn.

2. **Daryeel la'aan:** Dunida waxaa jira ha'yado iyo xarumo u xilsaaran daryeelka naafada, hase ahaatee Soomaaliya ha'yadahaas ma leh, taas oo keentay in dad badan oo naafo ahi ay dalka dhexdiisa ku dayacmaan.

3. **Sharci la'aan:** Sida la ogyahay in wax la qabto waxaa ka horraysa in la yaqaan cidda wax loo qabanayo iyo sida wax loogu qabanayo, sidaa darteed in la aqoonsado xuquuqda naafada waxaa ka horreysa in sharci ahaan la qeexo. Wuu jiraa Xeer naafo oo dowladda Soomaaliya meelmarisay balse aan wali la fulin, sidoo kale Puntland waxaa golayaasha dowladdu ansixiyeen siyaasadda naafada, balse wax fulin ah oo ka dhaqangalay ma ay jirto.

4. **Shaqo la'aan:** Naafada kuwooda wax bartay fursad kama helaan suuqa shaqada ee kooban, taas waxa ay keenaysaa inay la kulmaan niyad jab iyo kuwooda waxbaran lahaa oo waxbarashada ka quusta.

5. **Awood darro laga aaminsan yahay:** Bulshada Soomaalidu waxa ay Naafada ula dhaqantaa inay yihiin Bulsho tabar daran oo mudan mar walba in la caawiyo, balse xaqiiqdu taas way ka duwan tahay oo qofka naafada ah haddii loo fududeeyo baahiyihiisa waxa uu noqon karaa mid ka horreeya dadka kale.

## SIDA DHIBAATOOYINKA JIRA LAGU XALLIN KARO:

1. In la abuuro dugsiyo iyo xarumo tababar oo naafadu ka faaiidaysato, awooddoodana sare loogu qaado.
2. In la xoojiyo wacyigelinta bulshada; iyadoo la adeegsanayo warbaahinta noocyadeedka kala duwan, bahda suugaanleyda iyo hoggaamiyayaasha bulshada sida culimada iyo dhaqanka.
3. In la sameeyo shuruuc tilmaamaysa xuquuqaha naafada.
4. In naafada waxbaratay la siiyo qoondo go'an oo kamid ah shaqaalaha dowladda.
5. In la sameeyo sanduuq lagu hormarinayo naafada, iyadoo loogu abuurayo ganacsiyo yaryar oo ay ka maareeyaan noloshooda.
6. In ganacsatada iyo qurbajoogtu ka qaybqaataan hormarinta naafada.

## GUNAANAD

Naafadu ma aha bulsho tabar daran ama wax qabsan kari waayay, balse waa kheyraad bini'aadmiyeed oo la dayacay, awoodna u leh inay door muuqda ka qaataan horumarka dalka haddii la helo daryeel, fursad iyo xuquuq dhab ah. Dhibaatooyinka haysta naafada Soomaaliyeed ma aha kuwo ka dhashay naafonimada lafteeda, balse waa natiijo ka dhalatay dayacaad dowladeed, faham bulsho oo qaldan, iyo sharciyo aan dhaqan gelin.

Haddii la hirgeliyo xalalka aan kor ku soo jeediyay sida waxbarasho loo dhan yahay, sharciyo dhaqangala, fursado shaqo, iyo wacyigelin bulsho—naafadu waxay noqon karaan tiir muhiim u ah dhismaha qaranka, halkii ay ka ahaan lahaayeen bulsho la illaaway. Mas'uuliyadda hormarinta naafada ma saarna dowladda oo keliya, balse waxa wadaaga bulshada rayidka ah, ganacsatada, culimada, warbaahinta iyo qurbajoogta Soomaaliyeed.

Sidaas awgeed, xaqiijinta xuquuqda naafadu waa imtixaan muujinaya heerka caddaaladda, bini'aadannimada iyo bisaylka bulshadeenna. Bulsho ixtiraamta naafadeeda waa bulsho u diyaarsan mustaqbalka wanaagsan ee dhammaan xubnaheeda.

**W/Q**: Ibraahiim Khaalid Maxamed



UNSOM



UNSOM

# LOOLLANKA QUWADAHA IYO BURBURKA NIDAAMKA CAALAMIGA AH:

## XAGGEE SOOMAALIYA KA TAAGAN TAHAY?



Iman Jama



Xigashada Sawirka: AI Gen

# HORDHAC

Tan iyo dhammaadkii Dagaalkii Labaad ee Adduunka, duniddu waxay ku socotay nidaam la isla oggol yahay oo lagu dhisay isku dheelitirnaan quwado, sharciyo caalami ah, iyo hay'addo loo arkayay kuwo ka sarreeya danaha dal gaar ah. Nidaamkaas, oo saldhig u ahaa xasilloonida caalamiga ah, waxaa ka dhashay Qaramada Midoobay, Bangiga Adduunka, iyo isbahaysiyo militari iyo siyaasadeed oo ujeeddadoodu ahayd in la yareeyo suurtagalnimada dagaallo waaweyn. Intii lagu jiray Dagaalkii Qaboobaa, inkastoo ay jireen laba garab oo iska soo horjeeday, haddana waxaa jiray xeerar aan la jebin karin iyo xuduud ay quwaduhu ka taxaddari jireen.

Burburkii Midowgii Soofiyeeti wuxuu dunidda geliyay marxalad cusub oo la rumaysnaa in ay horseedi doonto, nidaam caalami ah oo ku dhisan hal quwad. Laakiin riyadaas ma sii waarin. Laga soo bilaabo bilowgii qarnigan 21-aad, calaamado muujinaya daciifnimada nidaamkaas ayaa isa soo tarayay; faragelino militari oo aan sharci caalami ah lahayn, cunaqabataynn dhaqaale oo loo adeegsanayo sida hub siyaasadeed, iyo ururro caalami ah oo awooddoodii sii luntay.

Dagaalkii ka qarxay Ukraine 2022 wuxuu noqday iftiinkii si cad u muujiyay in nidaamkii caalamiga ahaa uu dillaacay. Markii ciidammo Ruush ah ay galeen Ukraine, duniddu waxay markhaati ka noqotay awood la'aan ka timid hay'adihii caalamiga ahaa ee loo igmaday ilaalinta madaxbannaanida dalalka. Waxaase la oran karaa sawirkaas waxaa si buuxda u dhammeystiray wixii ka dhacay marinka Qasa ee dhulka Falastiiniyiinta, halkaas oo indhaha dunida ay si toos ah u arkayeen carruur, haween iyo dad rayid ah oo lagu laynayo, iyadoo sharciyadii caalamiga ahaa, xeerarkii bani'aadantinimada, iyo xakameyntii awoodda militari ay noqdeen wax la iska indho tiray. Qasa waxay noqotay meesha lagu aasay fikraddii ahayd in quwadaha lagu xakameyn karo xeerar ay wada oggol yihiin.

Halkaas ayay ka caddaatay in cidda awoodda leh aysan maanta jirin wax ka hor istaagi kara haddii ay doonayso weerar, dhul-qabsi ama cadaadis siyaasadeed. Nidaamkii caalamiga ahaa wuxuu isu beddelay mid ku shaqeeya hal qaanuun: kan xoogga.

# BURBURKA HAY'ADAHA IYO ISBAHAYSIYADA

Markii hore, Qaramada Midoobay waxaa loo arki jiray madal ay ku kulmaan dalalka dunidda si ay u xalliyaan khilaafaadka, u ilaaliyaan nabadda, una difaacaan dadka nugul. Maanta, hay'addaas waxay u muuqataa kuwa aan awood u lahayn inay xakameeyaan quwadaha waaweyn ama ay ka hortagaan xadgudubyo muuqda. Golaha Ammaanka, oo ah laf-dhabarta awoodda Qaramada Midoobay, wuxuu noqday goob ay quwaduhu ku difaacdaan danahooda, halkii uu ahaan lahaa hay'ad u adeegta caddaaladda caalamiga ah.

Isbahaysiyo waaweyn sida NATO, oo muddo dheer ahaa tiirkii wadajirka reer galbeedka, ayaa isna wajahaya kala shaki iyo jaahwareer. Dalal reer Yurub ah oo muddo dheer ku tiirsanaa Mareykanka ayaa maanta si hoose u muujinaya walaac ku saabsan jihada siyaasadda Washington. Ficillada degdegga ah, cunaqabataynta aan xisaabta ku dhisnayn, iyo isticmaalka awoodda dhaqaale si cadaadis loo saaro xulafo, ayaa abuuray jawi cusub oo shaki ah.

Tusaale cad waxaa ah; Ra'iisul Wasaaraha Canada, Mark Carney markii uu booqday bartamhii bishii Jannaayo, 2026 dalka Shiinaha, wuxuu halkaas si aan gambasho lahayn uga sheegay baahida loo qabo nidaam caalami ah oo cusub. Canada, oo ahayd xulafo dhow oo Mareykanka ah kana mid ah shanta dal ee isku xira nidaamka sirdoonka ee loo yaqaan "Five Eyes" oo ujeedka loo dhisay uu ahaa ka hortagga saameynta Shiinaha, ayaa si cad u muujisay inay doonayso inay ka hoos baxdo ku-tiirsanaanta hal quwad. Arrintan waxay timid kaddib cunaqabataynn iyo cadaadis dhaqaale oo ay Canada kala kulantay Mareykanka, taasoo ku qasabtay Ottawa inay raadsato xiriirro kale oo caalami ah, xitaa haddii ay la macno tahay inay u weecato Shiinaha oo Washington u aragto cadow istiraatiiji ah.

Dhanka kale, wasiirka arrimaha dibadda Ruushka, Sergey Lavrov, ayaa si cad u sheegay dabayaaqadii bishii Jannaayo 2026 in nidaamkii caalamiga ahaa ee reer galbeedku ku faani jireen uu burburay, isla markaana dunidda uu maanta ka shaqeeyo sharci ah in cidda xoogga weyn ay wax maamusho. Hadalkaas, oo mar hore loo arki lahaa mid kicin ah, maanta wuxuu noqday aragti ay dad badan qirsan yihiin.

## LOOLLANKA GOOBAHA ISTIRAATIIJIGA AH

Burburka nidaamka caalamiga ah wuxuu si toos ah u horseeday tartan cusub oo ku wajahan goobaha istiraatiijiga ah: marinno biyoodyo, jasiirado, iyo dhulal hodan ku ah khayraadka dabiiciga ah. Tartankaas wuxuu gaaray heer ay xitaa quwaduhu ku cadaadinayaan xulafadooda. Wararka soo baxaya ee ku saabsan cadaadis Mareykanka oo lagu doonayo in xulafo Yurub ah ay taageeraan qorshayaal la xiriira jasiiradda Greenland inuu Mareykanka qaato ayaa tusaale u ah sida loollanka cusub u jebiyay xeerarkii hore ee ixtiraamka xuduudaha iyo madaxbannaanida.

Dunidan jaahwareersan dhexdeeda, waxaa cirif istiraatiji ah kaga taal Soomaaliya oo ah dal ku yaalla marinno biyoodyo istiraatiiji ah, leh xeebta ugu dheer Afrika, kuna fadhiya isku xirka Badweynta Hindiya iyo Badda Cas. Waa dal leh khayraad dabiici ah oo aan wali si buuxda loo sahamin, balse la ogyahay in ay ku jiraan waxa dunidu maanta ku dagaallamayso: tamar, macdan, iyo marin ganacsi, taasi waxay si cad u qeexaysa in la joogo waqtigii indhaha oo dhan ay soo eegi lahaayeen Soomaaliya.

Hase yeeshee, Soomaaliya waa dal muddo ka badan 30 sano ku guuldarreysatay inuu dhiso nidaam dowladeed oo awood leh, oo ilaalin kara xuduudihiisa dhulka, badda iyo cirka. Daciifnimadaas ayaa ka dhigaysa dalka mid u nugul faragelin shisheeye, isla markaana sahashay in loollanka caalamiga ah uu gudaha dalka ka noqdo mid muuqda.

Arrinta Somaliland ayaa noqotay tusaalaha ugu cad ee isbeddelkaas. Muddo ka badan 33 sano oo ay raadineysay aqoonsi caalami ah kaddib, waxay heshay cid aqoonsata, aqoonsigaasna wuxuu ka yimid Israa'iil.

Israa'iil waa dal xiriir dhow la leh Mareykanka, isla markaana inta badan u dhaqma sida wakiil matala danaha Washington ee gobolka. Aqoonsigaas wuxuu Soomaaliya geliyay bartamaha loollanka quwadaha, xilli dalal kale sida Turkiga, Sacuudiga, Pakistan iyo Qatar ay iyaguna yihiin xulafo wada socda oo doonaya inay saameyn ku yeeshaan mustaqbalka Soomaaliya.

Taariikh ahaan, Soomaaliya waxay marar badan noqotay goob ay ku hardamaan quwado shisheeye, laga soo bilaabo Dagaalkii Qaboobaa ilaa maanta. Farqiga maanta jira ayaa ah xaalada ay Soomaaliya manta ku sugantahay iyo in nidaamkii caalamiga ahaa ee xaddidayay faragelintaas uu burburay, taasoo ka dhigaysa loollanka mid ka khatar badan kii hore.

## GABAGABO IYO TALOOYIN

Isbeddelka caalamiga ah ee hadda socda ma aha mid ku meel gaar ah; waa marxalad cusub oo laga yaabo inay go'aamiso masiirka dalal badan.

Soomaaliya, oo ku suntan daciifnimo dhisme dowladeed iyo kala qeybsanaan siyaasadeed, waxay halis ugu jirtaa inay ku dhacdo goob aysan ka soo laaban karin haddii aan si degdeg ah loo qaadin tallaabooyin xeeladaysan.

Casharka ugu weyn waxaa laga baran karaa Ukraine. Inkastoo ay ahayd dowlad leh ciidan, dhaqaale iyo taageero caalami ah, haddana isbeddelka nidaamka caalamiga ah iyo loollanka quwadaha ayaa sababay in dhul badan laga qabsado, isla markaana madaxbannaanideedu ay gasho xaalad aan hore loo arag. Soomaaliya iyo Ukraine waxay wadaagaan astaamo dhowr ah: marinno biyoodyo istiraatiiji ah, khayraad dabiici ah, iyo muhiimad juqraafiyeed oo ka dhigaysa bartilmaameed.

Haddii Soomaaliya aysan si degdeg ah u mideyn aragtideeda qaran, u dhisin hay'ado awood leh, una ilaalin xuduudaheeda, waxay wajihi doontaa kala qeybin buuxda, burbur dheeraad ah, iyo faragelin shisheeye oo amarro dejisa. Xalku ma aha in la doorto hal quwad oo la isku halleeyo, balse waa in la dhiso siyaasad dheelitiran oo ku dhisan dan qaran, laguna wajaho dunidda isbeddelaysa si feejigan.

Soomaaliya waxay u baahantahay hoggaan fahmaya in waqtigu uusan sugeyn, in nidaamka caalamiga ah ee hore aan dib loo soo celin doonin, isla markaana badbaadadu ay ku jirto midnimo gudaha ah, dib-u-dhis hay'adeed, iyo aragti qaran oo ka sarreysa danaha gaarka ah. Haddii kale, taariikhdu mar kale way qori doontaa cutub kale oo murugo leh, Soomaaliyana waxay noqon doontaa tusaale kale oo muujinaya sida dal daciif ah uu ugu baaba'o loollanka quwadaha adduunka.

**W/Q:** Iman Jama

# AQOONSIGA SOMALILAND KADIB:

## MAXAA PUNTLAND LA GUDBOON?



Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)



Xigashada Sawirka: AI Gen

## AQOONSI BEDDELAY MIISAANKA SIYAASADDA GOBOLKA

26-kii December 2025, Somaliland waxaa si rasmi ah u aqoonsatay Israa'iil, tallaabadaas oo si weyn u beddeshay miisaanka siyaasadeed ee Geeska Afrika. Inkastoo aqoonsigani u muuqdo mid labo geesood ah, haddana waxaa jira tuhun xooggan oo tilmaamaysa in Imaaraadka Carabtu uu door fududeyn ah ka qaatay, maadaama uu horeyba xiriir qoto dheer ula lahaa Somaliland, gaar ahaan dhinacyada dekedaha, amniga iyo maalgashiga. Aqoonsigan ma aha arrin ku eg Somaliland oo keliya, balse wuxuu si toos ah u saameynayaa Puntland, oo ah maamul xubin ka ah federaalka Soomaaliya oo xuduud dheer la leh Somaliland, isla markaana ay kala dhaxayso khilaaf dhuleed, dano amni iyo xiriir goboleed oo aad u adag.

## SAAMAYNTA AMNIGA: XUDUUD NUGUL IYO KHILAAF SHARCI

Marka hore, dhinaca amniga, aqoonsiga Somaliland wuxuu Puntland gelin karaa xaalad nuglaansho cusub. Puntland waxay isu beddeli kartaa marin ay ka gudbaan ama xarun ay ka samaystaan kooxaha ama shakhsiyaadka diidan aqoonsiga Somaliland, taas oo keeni karta cadaadis amni iyo mid siyaasadeedba. Xuduudda dheer ee u dhexeeya labada dhinac, gaar ahaan gobollada Sanaag iyo Sool, (Waqooyi-bari) ayaa noqon karta meel isku dhacyo iyo faragelin shisheeye ka dhacaan. Waxaa intaa dheer in dhulal ay Somaliland sheeganayso ay dastuur ahaan ka tirsanyihiin Puntland, taas oo khilaafka ka dhigaysa mid sharci iyo qaranimo salka ku haya, halkii uu ka ahaan lahaa muran siyaasadeed oo keliya.

## DOORKA IMAARAADKA IYO XIISAHA TURKIGA: LAASQORAY IYO CULEYSKA JUQRAAFI-SIYAASADEED

Dhinaca kale, arrinta Imaaraadka Carabta ayaa leh miisaan gaar ah. Waxaa la ogyahay in Imaaraadku uu xiriir dhow, oo dadka qaarkood ku sifeynayaan mid shakhsi iyo qoys ku dhisan, uu la leeyahay Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni. Xiriirkaas ayaa Puntland gelin kara xaalad xasaasi ah, gaar ahaan marka la eego khilaafka sii xoogeysanaya ee u dhexeeya Imaaraadka iyo Sucuudiga. Haddii Puntland loo arko inay si toos ah ama dadban ula safatay Imaaraadka, waxaa dhici karta in ay wajahdo cadaadis siyaasadeed ama dhaqaale oo kaga timaada dalalka Sucuudigu hoggaaminayo, kuwaas oo saameyn ku leh arrimaha Soomaaliya iyo taageerada caalamiga ah.

Dhanka Turkiga, xiisaha sii kordhaya ee uu u qabo waqooyiga Soomaaliya, gaar ahaan suurtagalnimada saldhig amni ama mid istiraatiiji ah oo laga sameeyo Laasqoray, ayaa isna ah arrin culus. Laasqoray oo ka tirsan gobolka Sanaag, kana mid ah dhulalka uu muranku ka taaganyahay, ayaa Turkiga u noqon karta marin istiraatiiji ah oo uu kaga dhawaanayo Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed. Haddii Turkigu halkaas saldhig ka sameeyo, Puntland waxay wajihi doontaa cadaadis cusub oo dhinaca juqraafi-siyaasadeed ah, iyadoo laga yaabo in lagu cadaadiyo mowqifkeeda ku aaddan Somaliland, Federaalka iyo xulafada gobolka.

## PUNTLAND ISGOYS TAARIIKHI AH: FEDERAALKA IYO MAQAAM GAAR AH

Marka la isku geeyo dhammaan saameyntaas, Puntland waxay taagantahay isgoys taariikhi ah. Dhinac, waxay si cad u sheeganaysaa inay tahay maamul federaal ah oo ka tirsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kana duwan maamullada kale marka loo eego taariikhda dhismaha maamul, awoodda amni iyo nidaamka hay'adeed. Dhinaca kale, isbeddellada cusub ee gobolka ayaa ku riixaya inay raadiso maqaam gaar ah; haddaba maxaa la gudboon Puntland?.

**Saddexda abbaarood (Siinaariyo) ee Horyaalla Puntland**

Waxa horyaalla Puntland saddex abbaarood (siinaariyo) oo waaweyn, mid walbana leeyahay cawaaqib u gaar ah.

## ABBAARTA (SIINAARIYAHA) KOOWAAD: GOONI-U-ISTAAG

Abbaarta (siinaariyaha) koowaad waa in Puntland ku dhawaaqdo gooni u istaag. Tani, marka hore,

waxay u muuqan kartaa waddo ay Puntland ku raadinayso go'aan buuxa oo ay kaga baxdo cadaadisyada Federaalka iyo muranka joogtada ah ee Somaliland. Faa'iidada aragtidan waxaa ka mid noqon kara in Puntland si madax-bannaan u maamusho kheyraadkeeda, u dhisto xiriir diblomaasiyadeed oo toos ah, una qeexdo danaha dadkeeda si aan cid kale ugu dhex milmin. Hase yeeshee, caqabadaha ku lammaan gooni u istaagga ayaa aad uga culus faa'iidooyinkiisa. Puntland waxay wajihi kartaa go'doon caalami ah, aqoonsi la'aan, iyo cadaadis dhaqaale oo ba'an. Waxaa intaa dheer khilaaf gudaha ah oo ka dhalan kara kala aragti duwanaanshaha bulshada, iyo khatar amni oo ka iman karta loollan toos ah oo ay la gasho Somaliland iyo Federaalka Soomaaliya. Marka la eego duruufaha hadda jira, gooni u istaaggu wuxuu noqon karaa tallaabo halis gelinaysa xasilloonida Puntland halkii uu xal u noqon lahaa.

## ABBAARTA (SIINAARIYAHA) LABAAD: MIDNIMO FEDERAALKA AH OO MAQAAM GAAR AH LEH

Abbaarta (siinaariyaha) labaad waa in Puntland ay si cad u taageerto midnimada Soomaaliya, balse ay si xeel dheer u raadiso nidaam maamul goboleed oo leh maqaam gaar ah, kana duwan kan maamulada kale (Assymitric Federalism). Qaabkan wuxuu u dhow yahay nidaamka Kurdistaanta Ciraaq ama jamhuuriyadaha ku jira Federaalka Ruushka, halkaas oo maamulku ka tirsanyahay dal weyn; balse la siiyo awood gaar ah oo ah dhinacyada amniga, dhaqaalaha iyo diblomaasiyadda. Faa'iidada ugu weyn ee abbaartan ayaa ah in Puntland ay ilaalinayso sharciyaddeeda federaal, isla markaana ay hesho awood ay si toos ah ugu maamusho arrimaheeda muhiimka ah. Waxay sidoo kale u suurtagelinaysaa inay si miisaan culus ula hadasho beesha caalamka, iyadoo aan jebin midnimada dalka. Ceebaha imaan kara waxaa ka mid ah suurtagalnimada in Muqdisho ama maamullada kale ay ka cawdaan kala duwanaanshahan, iyo baahida loo qabo wada xaajood dheer oo sharci iyo siyaasadeed. Si kastaba ha ahaatee, faa'iidooyinka nidaamkan ayaa ka badan caqabadihiisa, gaar ahaan haddii Puntland ay beddel ahaan diyaar u noqoto aqoonsiga maamulka Waqooy-bari Soomaaliya, taas oo ka caawin karta inay ka fogaato xuduud toos ah oo ay la yeelato Somaliland, isla markaana ay yareyso khilaafka joogtada ah.

## ABBAARTA (SIINAARIYAHA) SADDEXAAD: JOOGTAYNTA XAALADDA JIRTA (STATO QUA)

Abbaarta (siinaariyaha) saddexaad waa in Puntland ay sii ahaato sida ay hadda tahay, iyadoo xoogga saaraysa xasilloonida gudaha iyo ka qaybgalka doorashooyinka soo socda. Qaabkan, Puntland waxay ku xoojin kartaa taageerada midnimada Soomaaliya, iyadoo isla markaana si cad uga hortagi karta aqoonsiga Somaliland. Faa'iidada ugu weyn ee habkan ayaa ah in uu yareeyo khataraha degdegga ah, kana ilaaliyo Puntland jaahwareer siyaasadeed iyo mid amni,wuxuuna horseedi kara in Puntland ay Villa Soomaaliya ku fariisiso nidaam danaha Puntland ka shaqeeya saaxiibna la ah . Waayo 10-kii sano ee u dambaysay Puntland waxa ay lumisay samaaynteedii siyaasadeed; taas oo dhaxalsiisay in uu ku yimaado dib u dhac dhaqaale, siyaasadeed iyo horumarineedba.

Ceebta keliya ay abbaartan (siinaariyahaan) leedahay ayaa ah in Puntland ay heli waydo maqaam u gaar ah, balse hadii nidaamka siyaasadeed iyo hoggaanka Puntland ay danta guud ka hormariyaan middooda gaarka ah, waa mid ay isku waafajin karaan labada abbaarood (siinaariyow) ee labaad iyo sadexaad-ba; maadaama aysan weli Soomaaliya yeelan dastuur joogta ah oo la isku waaafaqsanyahay; sidoo kalena Somaliland oo ah qeyb wayn ay u muuqato mid sii baxaysa. ayna hadda fogtahay kasii mid noqoshada Soomaaliyadii 1960 midowday.

## GUNAANAD: XILLI GO'AAN IYO ARAGTI FOG

Gunaanad ahaan, aqoonsiga Somaliland ee Israa'iil iyo faragelinta quwadaha gobolku, waxay Puntland gelisay marxalad aan hore loo arag. Waa marxalad u baahan hoggaan aragti fog leh, go'aan qaadasho miisaaman, iyo istiraatiijiyad ka tarjumaysa xaqiiqda dhabta ah ee siyaasadda gobolka. Puntland haddii ay si xeel dheer u dhaqanto, waxay ka dhex heli kartaa maqaam gaar ah oo ay ku ilaashato danaha dadkeeda, isla markaana ay uga sii mid ahaan karto Soomaaliya; iyadoo leh cod iyo saameyn ka culus tii hore.

**W/Q:** Sakariya Axmed Maxamed (Rabiic)

# MA LA GAARAY XILLIGII SOOMAALIYA DIB U QEEXI LAHAYD SIYAASADDEEDA ARRIMAHA DIBADDA?



Cabdullaahi Cabdi
(Cabdullaahi Dheere)



# HORDHAC

Soomaaliya waxay u baahantahay siyaasad arrimo dibadeed (foreign policy) oo qorsheysan, fadhida (strategic), isla markaana ka tarjumaysa danaheeda qaranimo (national interests). Siyaasaddan ayaa ah aaladda ugu muhiimsan ee difaaca madaxbannaanida (sovereignty) iyo wadajirka midnimada dhuleed, gaar ahaan marka laga soo kabanayo burburkii dowladeed iyo khataraha gudaha iyo kuwa gobolka ka jira.

Qormadaan wuxuu bidhaaminayaa falanqayn istiraatiiji ah iyo talo-bixin cad oo ku saabsan sida Soomaaliya u dhisi karto siyaasad dibadeed oo waarta.

# 1. SIYAASAD AAN FADHIYIN IYO HALISTA KA IMAANAYSA

Soomaaliya waxay wajahaysaa halis weyn marka siyaasadda arrimaha dibadda aysan fadhiyin. Xaqiiqdu waxay tahay in siyaasad arrimaha dibadda oo aan fadhiyin ay horseedi karto fashil siyaasadeed iyo gafaf waaweyn oo dhaawaca madaxbannaanida iyo wadajirka midnimada dhuleed ee dalka.

Tani waxay ka dhigantahay in go'aanno degdeg ah oo ku saleysan cadaadis dibadeed, laabla-la-kac, dano shakhsiyeed, ama xaalado degdeg ah ay dhaawici karaan sumcadda Soomaaliya iyo awooddeeda fulinta ee siyaasadda arrimaha dibadda.

# 2. QEEXIDDA DANAHA QARANKA (DEFINE NATIONAL INTERESTS)

Si loo dhiso istiraatiijiyad arrimaha dibadda oo waarta oo wax ku ool ah, waxaa lama huraan ah in marka hore si cad loo qeexo danaha qaranka (national interests). Danaha qaranku waa tiirka hagaya go'aannada diblomaasiyadeed, xulashada xulafada, iyo qaabka ay Soomaaliya ula falgasho nidaamka caalamiga ah. Qeexid la'aan ama mugdi ku jira danaha qaranka waxay keeni kartaa jaahwareer siyaasadeed iyo u nuglaansho faragelin dibadeed.

### 2.1 Amniga Qaranka (National Security)

Amniga qaranku waa mudnaanta ugu sarreysa ee danaha qaranka. Waxaa si gaar ah diiradda loo saarayaa ilaalinta midnimada wadajirka dhuleed, sugidda madax-bannaanida qaranka (sovereignty), iyo ka hortagga khataraha amni ee gudaha iyo dibadda. Arrintani waxaa sidoo kale qayb ka ah la dagaallanka argagixisada iyo xaqiijinta amniga xuduudaha badda iyo berriga, kuwaas oo laf-dhabar u ah jiritaanka iyo badbaadada dowladnimada Soomaaliya.

### 2.2 Danaha Dhaqaalaha (Economic Interests)

Danaha dhaqaale waxay saldhig u yihiin xasilloonida iyo horumarka qaranka. Soomaaliya waxay dan weyn ka leedahay horumarinta ganacsiga (trade), soo jiidashada maalgashiga shisheeye (foreign investment), iyo ka faa'iidaysiga kheyraadkeeda dabiiciga ah (natural resources). Kheyraadka sida kalluunka, shidaalka, iyo gaaska ayaa ah fursado istiraatiiji ah oo haddii si xikmad leh loo maareeyo, kor u qaadi kara awoodda dhaqaale iyo tan siyaasadeed ee dalka.

### 2.3 Danaha Siyaasadda (Political Interests)

Dhanka siyaasadda, danaha qaranku waxay ku saleysanyihiin dhismaha xulafo istiraatiiji ah (alliances), kordhinta saameynta Soomaaliya ee fagaarayaasha caalamiga ah (influence), iyo ilaalinta sharaf iyo sumcad qaran (prestige). Xiriir diblomaasiyadeed oo miisaaman ayaa u oggolaanaya Soomaaliya in ay ka qaybqaadato go'aan-qaadashada caalamiga ah isla markaana ay si hufan u difaacdo mowqifkeeda siyaasadeed.

### 2.4 Danaha Dhaqanka iyo Fikradda (Cultural / Ideological Interests)

Danaha dhaqanka iyo fikradda waxay xoojiyaan aqoonsiga qaranka iyo midnimada bulshada. Kuwaas waxaa ka mid ah ilaalinta qiyamka (values), adkeynta aqoonsiga qaranka (identity), dhowrista diinta Islaamka (religion), iyo horumarinta luqadda Soomaaliyeed. Qodobbadani waxay door muhiim ah ka ciyaaraan sida ay Soomaaliya isu aragto iyo sida ay dunidu u aragto.

# 3. XAALADAHA GOBOLKA IYO CAALAMIGA AH (REGIONAL AND GLOBAL ENVIRONMENT)

Soomaaliya waxay ku dhex jirtaa deegaan ay ka socdaan mawjado siyaasadeed iyo dhaqaale oo tartan xooggan ka dhexeeyo, oo leh mid heer gobol iyo heer caalami labadaba. Fahamka qoto-dheer ee xaaladahaan waa lama huraan si loo difaaco danaha qaranka (national interests), madaxbannaanida (sovereignty), iyo midnimada dhuleed (territorial integrity).

**3.1 Nidaamka Caalamiga ah (Global System)**

Dunida maanta waxaa lagu tilmaamaa nidaam awoodo badan (multipolarity), halkaas oo quwadaha waaweyn sida Mareykanka, Shiinaha, Ruushka, UK, iyo awoodaha soo baxaya sida Turkiga, Saudi Arabia, Qatar, UAE iyo Iran ay ku tartamayaan saameynta gobolka (great power rivalries).

- **Fursadaha:** Taageero dhaqaale, tababar ciidan, ka qaybgal siyaasadeed oo caalami ah
- **Khataraha:** Faragelin siyaasadeed oo wax u dhimaysa sovereignty iyo territorial integrity

**3.2 Xaaladaha Gobolka (Regional Environment)**

Soomaaliya waxay ku taal gobol istiraatiiji ah oo ay ka jiraan tartan siyaasadeed, amni, iyo dhaqaale oo xoogan. Gobolkan waxaa ka jira khilaafaad xuduudeed, danaha quwadaha waaweyn, iyo isku-dhacyada danaha istiraatiijiga ah ee awoodaha gobolka. Quwadaha waaweyn sida Maraykanka, Shiinaha, iyo dalalka Turkiga, Qatar iyo UAE, iyo dalalka deriska ah sida Itoobiya, Kenya, iyo Jabuuti, waxay daneeyaan saameynta siyaasadeed, ganacsi, iyo amni ee gobolka, mid walbana wuxuu leeyahay dano isdiidan oo saamayn ku leh xasilloonida Soomaaliya.

Faham qoto-dheer oo ku saabsan xaaladaha siyaasadeed, amni, dhaqaale, iyo juquraafiyadda gobolka iyo caalamka ayaa muhiim ah si Soomaaliya u difaacdo danaha qaranka, u ilaaliso madaxbannaanida, isla markaana u xoojiso midnimada dhuleed. Fahamkan wuxuu sidoo kale u oggolaanayaa Soomaaliya in ay ka faa'iideysato fursadaha iskaashi, taageero caalami ah, iyo xoojinta saameynta ay ku leedahay go'aan-qaadashada gobolka iyo dunida.

# 4. MIDNIMADA GUDAHA: MURAAYADDA SIYAASADDA DIBADDA

Midnimada gudaha (internal cohesion) waa laf-dhabarta siyaasadda arrimaha dibadda. Dal gudaha ka kala qeybsan ma yeelan karo mowqif dibadeed oo xooggan.

Midnimada gudaha ma aha arrin gudaha oo keliya, balse waa hub istiraatiiji ah oo si toos ah u xoojiya siyaasadda arrimaha dibadda. Dal gudaha ka mideysan wuxuu dibadda ka yeeshaa mowqif cad, awood gorgortan (negotiation leverage), iyo kalsooni caalami ah (international credibility). Kala-qaybsanaanta gudaha waxay u sahashaa faragelin shisheeye waxayna wiiqdaa difaaca madaxbannaanida iyo midnimada dhuleed.

# 5. FULINTA SIYAASADDA DIBADDA: DOORKA DIBLOMAASIYADDA IYO SAFIIRRADA

Guusha istiraatiijiyadda siyaasadda arrimaha dibadda ma ku xirna oo keliya dejinteeda, balse waxay si toos ah ugu xirantahay sida loo fuliyo. Dowladda Federaalka Soomaaliya waa in ay xilalka muhiimka ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda u magacawdaa shaqsiyaad leh aqoon qoto dheer oo ku saabsan sharciga caalamiga ah iyo xiriirka caalamiga ah.

Safiirrada la dirayo waa in ay si qoto dheer u fahamsanyihiin taariikhda, dhaqanka, luqadda iyo siyaasadaha dalalka ay ka howlgalaan. Waa in ay si xeeladaysan u adeegsadaan diblomaasiyadda dhaqanka iyo kooxaha saamaynta leh (lobby groups), isla markaana ay si firfircoon uga qayb qaataan doodaha iyo fagaarayaasha qaabeeya siyaasadaha iyo daraasadaha istiraatiijiga ah, sida hay'adaha cilmi-baarista (think tanks).

Sig aar ah safiirrada loo magacaabayo dalalka awoodda leh sida Maraykanka, Boqortooyada Midowday (UK), Ruushka, iyo Shiinaha, iyo dalalka saaxiibka dhow sida Saudi Arabia iyo Turkiga, waa in ay lee yihiin karti ay ku metelaan dalka, u iib-geeyaan, ugana dhaadhiciyaan danaha qaranka, isla markaana ay difaacaan mowqifka Soomaaliya.

# GABAGABO

Siyaasadda arrimaha dibadda ee Soomaaliya waa inay noqotaa mid istiraatiiji ah, fadhida, oo ku dhisan danaha qaranka. Guusha siyaasaddan waxay ku xirnaan doontaa qeexid cad oo danaha qaranka, faham sax ah oo ku saabsan juquraafiyadda gobolka iyo caalamka, iyo midnimo gudaha oo xooggan.

Soomaaliya oo midowday, leh aragti wadaag, waxay dibadda ka noqonaysaa dal leh sharaf, saameyn, iyo awood uu si madax-bannaan ugu difaaco jiritaankiisa, isla markaana uga faa'iideysto fursadaha caalamiga ah. Siyaasad dibadeed oo cad waa furaha Soomaaliya maanta iyo mustaqbalka.

**W/Q:** Cabdullaahi Cabdi (Cabdullaahi Dheere)



# SOOMAALIYA 25 SANO KA DIB:
## DHISMAHA DOWLADNIMADA SADDEXAAD, DOORASHO IYO DASTUUR LAGU MURANSAN YAHAY – MAXAA XAL U AH 2026 IYO KA DIB? QAYBTA 2-AAD




Axmex Siciid Aw-nuur



**Xigashada Sawirka**: BBC Somalia

## SHIRKII CARTA 2000: NABADDA IYO DIB-U-HESHIISIINTA SOOMAALIYEED

Dadka Soomaaliyeed iyo beesha caalamkuba waxay aad uga daaleen shirarkii dib-u-heshiisiinta ee miro-dhal la'aanta ahaa ee qab-qablayaasha dagaalka (1990–2000). Toban sano oo qiimo badan ayaa ka lumay ummadda Soomaaliyeed. Shirkii ugu horreeyay ee la damacsanaa in gudaha Soomaaliya lagu qabto, kana dhacay Boosaaso, wuu suurtageli waayay. Sidoo kale, Madaxweynihii xilligaas ee Somaliland, Alle ha u naxariistee Maxamed Ibraahim Cigaal, oo isaguna damacsanaa inuu Soomaalida shir dib-u-heshiisiin ah ugu qabto Hargeysa, dadaalkiisa waxaa ka horreeyay shirkii Djibouti. Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle ayaa, isagoo ka qayb-galaya shir loo dhan yahay oo Qaramada Midoobay ah, ku dhawaaqay inuu Soomaalida u qabanayo shir dib-u-heshiisiin qaran, si ay Soomaaliya dib ugu soo laabato saaxadda caalamka.

Ka hor intaan shirka la qaban, Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle wuxuu isugu yeeray aqoonyahanno Soomaaliyeed, wuxuuna waydiiyay sida ugu habboon ee Soomaalida loo heshiisiin karo. Waxaa si qoto dheer looga dooday qaabka uu shirka u dhici lahaa, waxaana lagu taliyay in uu noqdo shir ay hormuud ka yihiin bulshada rayidka ah, sida hoggaanka dhaqanka Soomaaliyeed, aqoonyahannada, culimada, haweenka, dhallinyarada, iyo ganacsatada. Taladaas waxaa saldhig u ahaa in qab-qablayaashii dagaalka la soo tijaabiyay muddo toban sano ah, isla markaana ay ku guuldarreysteen inay wax xal ah u keenaan Soomaaliya. Inkasta oo shirka lagu casuumay qab-qablayaashii dagaalka ee dalka u kala qaybsanaa xilligaas, haddana waxaa si cad loogu sheegay inay ka mid yihiin bulshada inteeda kale, isla markaana aysan lahayn talo gaar ah ama mudnaan u gaar ah. Arrintaas ayaa si weyn uga caraysiisay qab-qablayaashii markaas jiray, taasoo keentay inay qaadacaan ka qaybgalka shirka.

Shirkii dib-u-heshiisiinta ee Carta, oo ay ka maqnaayeen qab-qablayaashii dagaalka ee mid walba sheeganayay inuu ka taliyo qayb gaar ah oo dalka ka mid ah, wuxuu socday muddo saddex bilood ah, laga bilaabo May 2000 ilaa 15-kii July 2000. Gunaanadkii shirka, Cabdiqaasim Salaad Xasan ayaa loo doortay Madaxweynaha Dowladda Ku-Meel-Gaarka ah ee Soomaaliyeed muddo afar sano ah. Madaxweynaha cusub wuxuu Ra'iisul Wasaare u magacaabay Mudane Cali Khaliif Galayr, halka Guddoomiyaha Baarlamaanka isagana loo doortay Mudane Cabdalla Deerow.

Dowladdii lagu dhisay Carta ee Jabuuti waxay u soo guurtay magaalada Muqdisho, waxaana si diirran u soo dhoweeyay shacabka, hase yeeshee kuma guulaysan inay dhamaystirto dib-u-heshiisiintii loo igmaday, mana hirgelin hub-ka-dhigis, mana gaarin wax horumar ah oo la taaban karo oo dhanka amniga iyo siyaasadda ah, iyadoo intii uu Mudane Cabdiqaasim Salaad Xasan xilka hayay uu magacaabay saddex Ra'iisul Wasaare, ugu dambayna muddadiisii ku dhammaatay dowlad aan xitaa si buuxda u xukumin xaafadaha Muqdisho, iska daa meelo kale oo dalka ka mid ah, taasoo ay barbar socotay cadaadis xooggan oo uga imanayay qab-qablayaashii horey u qaadacay shirkii Jabuuti iyo dalal shisheeye oo iska kaashaday wiiqidda dowladdaas.

Hal arrin oo ay dowladdii Carta ku guulaysatay waxay ahayd in, toban sano kadib burburkii Soomaaliya, mar kale dowlad Soomaaliyeed lagu arko fagaarayaasha caalamka sida shirarka Qaramada Midoobay, Jaamacadda Carabta, Midowga Afrika iyo IGAD, taas oo lagu tilmaami karo guul ay soo kordhisay, ugu dambayntiina Mudane Cabdiqaasim Salaad Xasan wuxuu ku biiray shirkii Kenya kadib cadaadis ka yimid beesha caalamka, halkaasna wuxuu xilkii ugu wareejiyay Madaxweynihii lagu doortay Mudane Cabdullaahi Yuusuf Axmed.

## SHIRKII IMBAGATI 2003–2004 EE NABADDA, DIB-U-HESHIISIINTA IYO DASTUUR-SAMAYNTA SOOMAALIYEED

Laba sano kadib dhismihii Dowladda Carta, waxaa billowday qabanqaabadii shirkii Kenya ee Imbagati lagu qabtay. Markan, qab-qablayaashii dagaalka waxaa la siiyay kaalin hormuudnimo, halka bulshada rayidka ahna la casuumay, balse hoggaanka dhabta ah ee shirka ay hayeen qab-qablayaasha dagaalka iyo siyaasiyiinta. Wadahadallo badan oo halkaas ka dhacay kadib, waxaa ugu dambayn lagu heshiiyey in la qaato nidaam federaal ah, waxaana la qoray Axdiga Dowladda Federaalka Soomaaliyeed oo ku dhisnaa nidaamkaas. Shirkii Imbagati waxaa Madaxweyne loogu doortay Mudane Cabdullaahi Yuusuf Axmed, isaguna wuxuu Ra'iisul Wasaare u magacaabay Mudane Cali Maxamed Geeddi, halka Guddoomiyaha Baarlamaanka loo doortay Mudane Shariif Xasan Sheekh Aadan.

Intii uu Nairobi joogay, Madaxweynuhu wuxuu ku dhawaaqay codsi uu u jeediyay beesha caalamka, gaar ahaan dowladaha deriska ah, isagoo ka dalbaday in ciidamo loo soo diro Soomaaliya. Arrintaas ayaa dhalisay khilaaf xooggan oo ka dhex qarxay baarlamaankii lagu soo xulay Kenya, kaas oo ugu dambayn gaaray heer ay gacan-ka-hadal iyo kuraas isula dhaceen xildhibaannadu intii ay shirayeen.

Muddo ka dib, dowladdii lagu dhisay Kenya waxay u soo guurtay gudaha dalka, iyadoo caga dhigatay magaalada Jowhar ee gobolka Shabeellaha Dhexe, oo markaas uu maamulayay Maxamed Dheere. Jowhar ayaa martigelisay dowladdii ku-meel-gaarka ahayd, ka hor inta aanay u guurin Baydhabo, oo noqotay magaalada labaad ee ay degto, ka hor inta aanay ugu dambayn u soo guurin magaalada Muqdisho, iyagoo ay galbinayaan ciidamada Itoobiya. Markii ay Muqdisho gaareen, dagaallo qaraar ayaa ka dhacay caasimadda, kuwaas oo dhexmaray ciidamada Itoobiya iyo Maxkamadihii Islaamiga ahaa ee markaas xukumayay magaalada, kuwaas oo taageero ka helayay qaybo ka mid ah bulshada Muqdisho.

Caqabaddii ugu weynayd ee ay la kulantay dowladdii Kenya lagu dhisay waxay ahayd Maxkamadihii Islaamiga ahaa ee midoobay, kuwaas oo dagaal hubeysan kala horyimid dowladdaas iyo ciidamada Itoobiya. Hase yeeshee, ciidamada Itoobiya ayaa ku guulaystay inay jab xooggan gaarsiiyaan ciidamadii Maxkamadaha, waxaana lagu khasbay inay kala firxadaan, iyadoo qaar ka mid ah hoggaankoodii is dhiibeen, kuwo kalena la qabtay. Ugu dambayntii, dowladda federaalku waxay saldhig ka dhigatay madaxtooyada Soomaaliya, halkaas oo laga taagay calanka Soomaaliya, madaxda dowladduna ay ka sameysteen xafiisyo rasmi ah oo ay shaqadooda ka bilaabaan.

Waxaa xusid mudan in Maxkamaduhu intii ay muddo kooban ka talinayeen magaalada Muqdisho ay dib u fureen Garoonka Diyaaradaha iyo Dekedda Muqdisho, isla markaana ay magaalada ka hirgeliyeen amni la taaban karo, hase yeeshee ay ku guuldarreysteen dhisidda nidaam dowladeed oo rasmi ah. Sidoo kale, Maxkamaduhu waxay ka caga-jiideen inay la heshiiyaan dowladdii ku-meel-gaarka ahayd ee Kenya lagu soo doortay, waxaana fashilmay shirar badan oo dibadda lagu qabtay oo lagu doonayay in labada dhinac la heshiisiiyo.

Si la mid ah dowladdii Cabdiqaasim, khilaaf ayaa soo kala dhexgalay Madaxweynihii markaas iyo labadii Ra'iisul Wasaare ee uu magacaabay, khilaafkaas oo ugu dambayn sababay in xaaladdu meel xun gaarto. Beesha caalamka ayaa markaas la safatay Nuur Cadde, oo ahaa Ra'iisul Wasaaraha, kadib khilaafkii isaga iyo Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf dhexmaray. Isla waqtigaasna, waxaa billowday isfahan u dhexeeya qaar ka mid ah hoggaamiyeyaashii Maxkamadaha Islaamiga ah iyo beesha caalamka, taas oo keentay in xal ay beesha caalamku ku qancday noqdo in Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf, inkastoo aanu waqtigiisu dhammaan, laga codsado inuu xilka ka dego, isaguna wuu aqbalay. Taas kadib, waxaa la bilaabay qabanqaabada shir dib-u-heshiisiin ah, waxaana loo xilsaaray ergaygii Qaramada Midoobay ee xilligaas in shir lagu qabto Jabuuti, si loo dhiso dowlad ay Maxkamaduhu door muuqda ku yeeshaan.

## SHIRKII JABUUTI 2009 IYO DOORASHADII MADAXWEYNE SHARIIF

Sida kor ku xusan, beesha caalamka oo markii hore dagaal hubeysan iyo cadaadis siyaasadeed ku qaaday Midowgii Maxkamadaha Islaamiga ah, marxaladdan dambe waxaa muuqday is-soo-dhawaansho, waxayna u arkeen Madaxweyne Shariif Shiikh Axmed inuu noqon karo hoggaamiye Soomaaliyeed oo wax ka qaban kara dhibaatooyinka taagnaa, gaar ahaan Al-Shabaab oo markaas noqotay garab madax-bannaan isla markaana inta badan caasimadda gacanta ku haysay. Xilligaas, muddadii dowladdii Kenya lagu dhisay way gabaabsi noqotay, Madaxweynaha ayaana lagu qasbay inuu xilka ka dego, arrintaasna wuu aqbalay.

Ra'iisul Wasaare Nuur Cadde ayaa markan noqday qayb ka mid ah geeddi-socodka shirkii Jabuuti, waxaana la isla qaatay in Baarlamaankii hore oo ka koobnaa 275 xubnood lagu daro 275 xubnood oo kale oo uu soo gudbiyo Shiikh Shariif, kana tirsanaa kooxdiisa. Shirkan waxaa lagu xusuustaa inuu ahaa kii lagu dhisay Baarlamaankii ugu tirada badnaa ee abid ay Soomaali yeelato. Gabagabadii shirkaas, Mudane Shiikh Shariif Shiikh Axmed ayaa loo doortay Madaxweynaha Soomaaliya, isaguna markii uu Muqdisho yimid wuxuu Ra'iisul Wasaare

u magacaabay Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharma'arke. Halkaas waxaa ka dhashay Dowladdii Ku-Meel-Gaarka ahayd ee saddexaad ee dibadda lagu soo dhiso, isla markaana uu Madaxweynaha ka noqday Guddoomiyihii hore ee Maxkamadaha Islaamiga ah. Beesha caalamku waxay aaminsanayd in dowladdani horseedi doonto dib-u-heshiisiin qaran, hase yeeshee waxaa la dhihi karaa waxa dhab ahaantii heshiiska gaaray waxay ahaayeen dowladdii Kenya lagu soo dhisay ee uu hoggaaminayay Nuur Cadde iyo Maxkamadihii Islaamiga ahaa.

## SHIRKII MUQDISHO EE ANSIXINTA DASTUURKA KU MEELGAARKA AH

Madaxweynenimadii Shiikh Shariif Shiikh Axmed muddadii saddexda sano ahayd (2009–2012), oo uu magacaabay saddex Ra'iisul Wasaare, waxaa si gaar ah loogu xusuustaa horumarkii laga sameeyay arrimaha amniga iyo geeddi-socodka dastuur-samaynta. Dowladdaasi waxay gaartay horumar la taaban karo laba qodob oo waaweyn: tan koowaad waxay ahayd ka saaristii Al-Shabaab ee magaalada Muqdisho iyo nawaaxigeeda; tan labaadna waxay ahayd shirarkii ka dhacay Garoowe oo diiradda lagu saaray dhamaystirka dastuurka, kuwaas oo ugu dambayn ku soo gabagaboobay shirkii ballaarnaa ee Muqdisho, kaas oo markii ugu horreysay dalka gudihiisa lagu qabto shir dastuur-dhisid heer qaran ah.

Shirarkii gudaha dalka lagu qabtay ee la xiriiray dastuur-samaynta waxay inta badan ka dhaceen magaalada Garoowe, waxaana loo yaqaanay Garoowe I iyo Garoowe II; sidoo kale waxaa jiray heshiiskii Gaalkacyo, iyo ugu dambayn shirkii weynaa ee Muqdisho, kaas oo markii ugu horreysay Madaxweyne Soomaaliya loogu doortay gudaha dalka, bishii September 2012. Shirkaas waxaa Madaxweyne loogu doortay Mudane Xasan Shiikh Maxamuud. Markii la doortay Xasan Shiikh, Shiikh Shariif Shiikh Axmed ayaa xilka si rasmi ah ugu wareejiyey, halkaasna waxaa ka bilaabatay dowladdii ugu horreysay ee si buuxda gudaha dalka loogu dhiso, gaar ahaan caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho.

Sidoo kale, sida dowladihii ka horreeyay, inkasta oo dowladdii Shiikh Shariif ay horumar ka samaysay labada qodob ee kor ku xusan, haddana kuma guulaysan inay dhamaystirto dib-u-heshiisiin buuxda oo dalka ka hirgasha, hirgelinta hub-ka-dhigis guud, iyo abuurista jawi is-aaminaad oo waara oo ka dhex dhasha bulshada Soomaaliyeed.

## SOOMAALIYA MA KA GUDUBTAY MARXALADDII KU-MEEL-GAARKA AHAYD 2012, MISE WELI WAXAY KU JIRTAA?

Markii ugu horreysay ee doorasho lagu wada heshiiyay ay gudaha dalka ka dhacdo, laguna doorto Mudane Xasan Shiikh Maxamuud sanadkii 2012, beesha caalamku waxay qaadatay laba go'aan oo waaweyn. Kan koowaad wuxuu ahaa in si rasmi ah loogu dhawaaqo in dowladda Soomaaliya ay ka baxday ku-meel-gaar, iyadoo magacii 'Dowladda Federaalka Ku-Meel-Gaarka ah' loo beddelay 'Dowladda Federaalka Soomaaliya'. Inkasta oo arrintaasi dhacday, haddana Soomaaliya illaa maanta waxay ku jirtaa nidaamka Qodobka 7aad (Chapter VII) ee Qaramada Midoobay, taas oo micnaheedu yahay in geeddi-socodka dhammaystirka dowladnimada uusan weli dhammaan, ayna weli jiraan shaqooyin guri oo badan oo horyaalla.

Beesha caalamku waxay la timid qorshe cusub oo loogu magac daray New Deal, kaas oo lagu beddelay siyaasaddii hore ee Dual Track Policy, taas oo ku dhisnayd in lala shaqeeyo Dowladda Federaalka Soomaaliya isla markaana si toos ah loola macaamilo dowlad-goboleedyada iyo maamulada maxalliga ah labadaba. Go'aanka labaad ee beesha caalamku qaadatay wuxuu ahaa in hay'adaha Bangiga Adduunka iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) ay bilaabaan la shaqaynta Soomaaliya geeddi-socodka deyn-cafinta. Nidaamkan oo socday muddo ka badan toban sano, wuxuu dhammaadkii

sanadkii 2024 gaaray heerkii ugu dambeeyay ee Completion Point, waxaana Soomaaliya laga cafiyey deyntii saarnayd. Sidoo kale, Soomaaliya waxaa qayb ahaan laga qaaday cunaqabateyntii hubka. Geeddi-socodka deyn-cafintaas waxaa si weyn uga shaqaysay, isla markaana meel wanaagsan soo gaarsiisay, dowladdii uu Madaxweynaha ka ahaa Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo.

In kasta oo tallaabooyinkaas waaweyn ay qaadday beesha caalamku, haddana Soomaaliya weli waxay ku sii jirtaa nidaamka Qodobka 7aad (Chapter VII) ee Qaramada Midoobay, sababtuna waa in caalamku weli u arko Soomaaliya dal khatar ku ah nabadda iyo ammaanka adduunka, maadaama ay ka hawlgalaan kooxo argagixiso, isla markaana ay jireen falal burcad-badeednimo iyo khataro kale. Sababaha kale waxaa ka mid ah in weli uusan dalka ka hirgelin hub-ka-dhigis guud, hubkuna si ballaaran gacanta ugu jiro, isla markaana aan weli si buuxda looga heshiin qaabka dowladnimada; iyadoo qaar ka mid ah gobollada Soomaaliya ay sheeganayaan inay ka go'een dalka, nidaamka federaalkuna aanu weli dhamaystirnayn, dastuurkiina uu yahay mid qabyo ah. Sidoo kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya weli kama taliso guud ahaan dalka, awooddeeduna ma gaarto dhammaan dhulka Soomaaliyeed. Iyadoo ay xaaladdaasi jirto, haddana beesha caalamku waxay go'aansatay inay si rasmi ah ula macaamisho Dowladda Soomaaliya, balse ay ku sii hayso nidaamka Chapter VII ilaa laga dhammaystirayo hawlaha waaweyn ee harsan.

Hawlaha weli ka dhiman Soomaaliya, si looga baxo xaaladda ku-meel-gaarka ah iyo nidaamka Chapter VII, waxaa ka mid ah xaqiijinta xasillooni siyaasadeed iyo sugidda amni dhammaystiran, sifaynta dalka ee argagixisada, mideynta iyo dib-u-dhiska ciidamada qalabka sida ee Soomaaliyeed, iyo soo celinta midnimada dalka, si looga maarmo joogitaanka ciidamada shisheeye, loona hubiyo in ka bixitaankoodu uusan dhalin firaaq amni, sida laga baqayo in haddii ATMIS baxdo ay Al-Shabaab la wareegi karto deegaanno badan oo koonfurta ka mid ah. Arrimaha kale ee weli ka dhiman dowladda Soomaaliya waxaa ka mid ah in hubka dalka si buuxda gacanta ugu galo dowladda, lana suurtageliyo kantarool, diiwaangelin iyo maarayn sharci ah; in la mideeyo Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada, lana helo heshiis cad oo lagu dhisayo hal nidaam dowladeed; dhammaystirka arrimaha ka dhiman federaalka; dhammaystirka Dastuurka Kumeelgaarka ah; abuurista xasillooni siyaasadeed oo waarta; iyo hirgelinta nidaam caddaaladeed oo lagu heshiiyo, kana dhaqangala dhammaan dalka.

## SII-WADISTA DHISMAHA DOWLADNIMADA SOOMAALIYA IYO DASTUUR WELI QABYO AH (2012–2025)

Dowladdii lagu dhisay magaalada Muqdisho sanadkii 2012, oo ay isaga dambeeyeen saddex Madaxweyne, weli ma dhammaystirin qodobadii ka dhimanaa Dastuurka Kumeelgaarka ah ee markaas lagu wareejiyey. Inkasta oo dowlad-goboleedyo la dhisay, haddana weli laguma heshiin nidaamka doorashooyinka dalka. Hirgelintii nidaamka federaalka waa qabyo, halka garsoorka dalkuna uu weli kala dhantaalanyahay, isla markaana aan weli lagu heshiin qaabka nidaamka garsoor ee dalka. Sidoo kale, nidaamka maaliyadeed ee federaalka (fiscal federalism) weli laguma heshiin, qaybsiga khayraadka dalka ee waafaqsan nidaamka federaalka ahna weli waa muran. Arrimaha amniga weli si buuxda looma dhamaystirin, iyadoo qaybo ka mid ah dalka ay maamulaan kooxo xag-jir ah, halka hubkuna weli ku jiro gacanta qabaa'illo iyo kooxo aan dowlad ahayn.

Sidaas awgeed, dhammaan arrimahan waxay muujinayaan in dowladnimadii saddexaad ee Soomaaliyeed ay weli kala dhantaalantahay, isla markaana aan weli lagu guulaysan dhammaystirka dhismaha dowladnimo buuxda oo Soomaaliya ka hanaqaadda.

Dowladda hadda jirta oo muddo xilligeedii uu gabaabsi ku dhowyahay, waxay wax ka beddeshay dastuurkii heshiiska lagu ahaa, iyadoo aan helin wadar-ogol iyo hannaan hufan oo lagu wada qancay. Geeddi-socodka

wax-ka-beddelka dastuurka waxaa si cad uga biyo-diiday laba maamul-goboleed iyo siyaasiyiin badan oo mucaarad ah. Sidoo kale, dowladda hadda jirta waxay diyaarisay nidaam doorasho dowladaha hoose ah oo aan iyadana heshiis lagu ahayn, taas oo si weyn uga horyimaadeen laba maamul-goboleed iyo siyaasiyiin badan oo mucaarad ah, iyagoo u arkay in doorashadu tahay hab uu madaxweynaha hadda xilka haya doonayo inuu ku sii joogo ama ku sii xoojiyo talada.

Waxaa xusid mudan in Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud, xilligii uu mucaaradka ahaa, uu si adag uga horyimid dowladdii ka horreysay oo isku dayday inay qabato doorasho aan heshiis lagu ahayn, isagoo ku dooday in doorasho aan wadar-ogol lagu dhisin aysan dalka ka dhici karin; arrintaasna waxay dad badan ula muuqataa mid layaab leh, maadaama uu maanta sax u arko wixii uu shalay diidanaa.

## TARTANKA HORMUUDKA SIYAASADDA SOOMAALIYEED (POLITICAL ELITES) IYO SAAMEYNTOODA TABAN

Tan iyo markii la aas-aasay dowladnimada Soomaaliya, laga bilaabo xilligii is-maamulka 1956 ilaa maanta, hormuudka siyaasadda Soomaaliyeed badankood waxay ku jireen tartan joogto ah oo ku wajahan kuraasta hoggaanka. Damaca iyo loollanka siyaasadeed ee hoggaamiyeyaasha Soomaaliyeed inta badan wuxuu ku salaysnaa dan shaqsiyeed, iyadoo madaxnimada looga dan leeyahay dano gaar ah. Aad bay u yar yihiin, ama xitaa waa la oran karaa way adagtahay in la helo, siyaasi Soomaaliyeed oo maanta u arka raadinta hoggaanka mid ku dhisan qiyam, aragti siyaasadeed iyo rabitaan uu ummadda ugu adeego. Ujeeddadu inta badan waxay noqotay dano iyo damac shaqsiyeed, halkii ay ka ahaan lahayd aragti siyaasadeed oo ka baxsan danaha qofka.

Dowladnimadii kowaad ee Soomaaliya, oo dhalatay kadib markii uu gumaysigu ka tagay dalkana la qaatay xorriyadda, waxay jirtay sagaal sano. Sababta ugu weyn ee keentay burburkeeda waxay ahayd tartan xun oo ka dhex qarxay hormuudkii siyaasadeed ee xisbiga talada hayay, kaas oo gaaray heer musuqmaasuq doorasho. Siyaasi walba wuxuu bilaabay inuu xisbi u gaar ah sameysto, kuna saleeyo qabiil si uu kursi baarlamaan u helo. Sidaas darteed, qabyaaladdii iyo dowladnimadii ayaa is dhex galay, kuna milmay sannadihii u dambeeyay ee dowladnimadii kowaad.

Arrintaas awgeed, waxaa la dhihi karaa qabyaaladdu ayay si toos ah u dumisay dowladnimadii kowaad, taasoo ugu dambayn keentay in ciidamada dalka, iyagoo daliil ka dhigaya xaaladdii siyaasadeed ee cakirnayd, ay xukunka si xoog ah ula wareegaan.

Ciidamadii xukunka la wareegay iyaguna muddo dheer waxay ku dhaqmeen cabburin, xarig iyo dil ka dhan ah cid kasta oo aragti siyaasadeed kaga duwan. Ugu dambayn, hab-dhaqankaas ayaa horseeday in qabaa'ilka Soomaaliyeed ay dumaan dowladnimadii labaad, kadib markii dowladdu marba qabiil la gashay dagaal. Arrintaas waxaa sii huriyay siyaasiyiin kursi-doon ah oo qabaa'ilka u adeegsaday aalad ay ku gaaraan damacooda siyaasadeed, iyagoo u arkay in qabyaaladdu tahay jidka ugu sahlan ee dowlad looga horkeeni karo.

Sidaas darteed, dowladnimadii labaad ee Soomaaliyeed waxaa jilbaha dhulka u dhigay is-biirsiga cabburin dowladeed iyo siyaasiyiin damac shaqsi ku dhisan, kuwaas oo aan lahayn aragti qaran ama qorshe dowlad-dhisid oo mideeya dalka.

Markii ay burburtay dowladnimadii labaad, muddo toban sano ah Soomaaliya waxay u kala qoqobnayd qab-qablayaal dagaal oo mid walba ka taliyo degaan gaar ah, kuwaas oo aan iyaguna heshiis ahayn, kuna guuldarreystay inay heshiiyaan, xalna u keenaan dalka ama dib u soo celiyaan dowladnimadii duntay. Taasi waxay keentay in shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamkuba ay ka niyad-jabaan qab-qablayaasha. Sidaas darteed, shirkii Carta doorkooda waa la yareeyay, inkastoo mar kale kor loo qaaday shirkii Kenya. Si kastaba ha ahaatee, ugu dambayn waxay ku dhammaadeen meel xun, markii Maxkamadihii Islaamiga ah ee ka dhismay Muqdisho ay jab xooggan gaadhsiiyeen qab-qablayaashii dagaalka, halkaasna uu ku soo afjaray waayihii ay talada hayeen.

Dowladnimada saddexaad ee Soomaaliya hadda waxay jirtay ku dhowaad 25 sano. Sida kor ku xusan, weli waxaa jira arrimo badan oo aan laga heshiin, kuwaas oo caqabad ku ah

dhammaystirka dowladnimada. Arrimahaas waxa ku guuldarreystay inay ka heshiiyaan hormuudka siyaasadda Soomaaliyeed—ha joogeen heer federaal ama heer dowlad-goboleed. Afartii sano kasta waxaa lagu mashquulaa doorasho, marka hoggaan cusub la doortana muran iyo is-qabqabsi ayaa isla markiiba dib u billowda. Waxay ku fashilmeen inay dhamaystiraan Dastuurka Kumeelgaarka ah iyo qodobadiisa ka dhimman, iyo sidoo kale nidaamyadii kale ee qabyada ahaa ee weli aan heshiiska laga gaarin. Sidoo kale, waxay ku guuldarreysteen arrimaha amniga, iyagoo aan awoodin inay ku heshiiyaan qorshe qaran oo mideysan oo dalka lagu sugi karo. Sidaas darteed, waxaa la oran karaa hormuudka siyaasadeed ee xilalka ka soo qabtay Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada, oo aan muddo 25 sano ah ku guulaysan inay ku heshiiyaan dastuur dhamaystiran iyo tiirarka kale ee dowladnimada, waxay la mid yihiin qab-qablayaashii sagaashamaadkii ku fashilmay inay ku heshiiyaan dib u soo celinta dowladnimadii burburtay.

Sababta ugu weyn ee madaxda maanta joogta u heshiin la'yihiin waxay salka ku haysaa laba arrimood: tan koowaad waa in hadafka ugu weyn ee badankood uu yahay raadinta iyo haynta madaxnimada, halkii ay ka qaadi lahaayeen aragti siyaasadeed oo qaran oo xal u keenta dhibaatooyinka taagan. Sidaas darteed, aragti siyaasadeed oo mideysan, ka baxsan dan shaqsiyeed, weli ma muuqato.

Waxaa suurtagal ah in maalin ay timaaddo in shacabka Soomaaliyeed ay ka dhiidhiyaan xaaladdan, isla markaana ay sida ay hore uga takhaluseen qab-qablayaashii dagaalka uga takhalusaan kuwa maanta isu arka hormuudka siyaasadda, kuwaas oo muddo 25 sano ah ku muransanaa dowladnimada, balse ku guuldarreystay inay xal waara u helaan.

## DOWLADNIMADII SADDEXAAD EE SOOMAALIYA (2000–2025): MA DHIMATAY MISE WAA LA BADBAADIN KARAA?

Sida keliya ee lagu badbaadin karo dowladnimada saddexaad ee qabyada ah ee Soomaaliya ma aha in afartii sano mar lagu heshiiyo qaabka doorasho oo keliya, balse waa in marka hore laga heshiiyo waxa salka u ah muranka dowladnimada. Saddex dowladood oo is xigay tan iyo 2000, gaar ahaan intii ka dambaysay 2012, waxay ku guul-darreysteen inay dhammeystiraan arrimaha qabyada ka ah dhismaha dowladnimo ee Soomaaliya. Sidaas darteed, maanta looma baahna in laga sugo oo keliya dowladda xigta inay xaliso caqabadahaas, balse waxaa lama huraan ah in la raadiyo heshiis bulsho (social contract) oo qaran, laguna saleeyo wadahadal ballaaran oo lagu kala caddeeyo laguna heshiiyo qodobada muranka ka taaganyahay, gaar ahaan dhammeystirka Dastuurka iyo qaab-dhismeedka nidaamka federaalka.

Haddii taas la waayo, micnaheedu wuxuu noqonayaa in dowladnimadii saddexaad aan la badbaadin, isla markaana ay iyaduna ku dhiman doonto 25 sano ka dib muran, is-jiid-jiid siyaasadeed, iyo kalsooni darro joogto ah.

**Xalku muxuu yahay?**

**Wada-hadal qaran oo loo dhan yahay:** Ka hor dhammaadka muddo-xileedka dowladda hadda jirta, waa in la qabtaa wada-hadal qaran oo ay ka qayb galaan madaxda Dowladda Federaalka, dowlad-goboleedyada, siyaasiyiinta madaxnimada doonaya, iyo wakiillo si hufan loo soo xulay oo matalaya bulshada rayidka ah, si si qoto dheer looga wada hadlo arrimaha Dastuurka iyo Doorashooyinka. Haddii aan heshiis siyaasadeed la gaarin ka hor dhammaadka muddo-xileedka, dalka wuxuu geli karaa khatar amni iyo firaaq dowladeed.

**Khataraha isbeddelaya ee gobolka iyo caalamka:** Arrimaha ka soo kordhay Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, aqoonsiga Israel ee Somaliland, iyo xiisadda sii xoogaysanaysa ee juqraafi-siyaasadeed ee Geeska Afrika waxay halis toos ah ku yihiin jiritaanka iyo midnimada Soomaaliya haddii aan midnimo qaran lagu wajihin. Haddii muranka dastuurka iyo doorashooyinka la xallin waayo,

waxaa suurtagal ah in khilaafaadka gudaha ay noqdaan kuwo wakiil ka ah dano shisheeye, taasoo xaaladda sii xumayn karta. Sidoo kale, haddii muddo-xileedka dowladda hadda jirta dhammaado iyadoo aan heshiis la gaarin, waxaa dhici karta in sharciyaddeeda lagu murmo, isla markaana uu abuurmo is-barbaryaac la mid ah kuwii Soomaaliya hore u soo martay.

**Dhammaystirka Dastuurka:** Arrimaha dastuurka waa in loo saaraa guddi farsamo-yaqaanno madaxbannaan, kuwaas oo loo xilsaaro dhammaystirka Dastuurka. Dhinac kasta waa in uu aragtidiisa qoraal ah ka gudbiyaa qodobada u baahan dhammaystirka. Guddiga farsamo-yaqaannadu waa in ay muddo aan ka badnayn laba bilood ku soo bandhigaan nuqul kama dambays ah. Waa in la aqbalaa in cidna heli doonin 100% wixii ay rabto, balse tanaasul guud oo ku dhisan danta qaranka uu yahay furaha heshiiska.

**Heshiis bulshoo ka horreeya doorashooyinka 2026:** Sannadka 2026, Soomaaliya waxay u baahantahay heshiis bulsho oo cad oo lagu saleeyo qaabka dowladnimada mustaqbalka, ka hor inta aan doorasho la qaban. Taasi waxay u sahlaysaa dowladda soo socota inay fuliso ajande qaran oo horay loogu heshiiyay, halkii ay ka bilaabi lahayd muran cusub.

**Xalka arrimaha doorashooyinka:** Xalka doorashooyinka wuxuu ku jiraa in lagu heshiiyo nidaam ka horumarsan kuwii hore, kana yareeya musuqmaasuqa, kana xannibaya in cid gaar ahi awood u yeelato inay si gaar ah u soo xulato xildhibaannada. Waa in la dhisaa hannaan hufan, la isla oggol yahay, kalsoonina ku abuuraya shacabka.

**Ka bixidda xaaladda ku-meel-gaarka ah:** Soomaaliya ficil ahaan weli kama bixin xaaladdii ku-meel-gaarka ahayd. Dowladda wali si buuxda uma hayso gacan-ku-haynta amniga dalka, Al-Shabaab ciidan ahaan lagama adkaan, heshiisna lama la gelin, hubkii culusna wali wuxuu ku jiraa gacanta shacabka iyo kooxo aan dowlad ahayn. Arrimahaas iyo kuwo kale waa in xal cad loo helaa inta lagu jiro muddo-xileedka soo socda, iyadoo horay loo sii dejinayo waajibaadka dowladda soo socota si loo dhamaystiro amniga iyo xasilinta dalka.

Hirgelinta doorasho qof iyo cod ah: Dowladda soo socota waa in la siiyo waqti ku filan si ay u hirgeliso nidaamka qof iyo cod, uguna dhamaystirto hawlaha qabyada ah ee dowladnimada. Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha xiga (oo aan hadda la ogayn cidda ay noqon doonaan) waa in aan loo oggolaan inay furaan ururro siyaasadeed iyaga u gaar ah; kaalintooda ugu weyn waa in ay noqotaa hirgelinta doorasho qof iyo cod ah, ururinta hubka culus, iyo dhammaystirka tiirarka ka dhiman dowladnimada Soomaaliyeed.

**W/Q:** Axmed Siciid Aw-nuur






# QARAN AAN DIB U FEKERIN MA BADBAADO



Maxamed Nadif Maxamed
(Showkaani)



Xigashada Sawirka: AI

Buugiisa (Think again – the power of knowing what you don't know) ayuu qoraa la yiraahdo Adam Grant si buuxda ugu difaacay in qof kasta ay tahay inuu dib ugu fekero waxyaabaha agtiisa ka dhacaya ama waxyaabaha uu ku qanacsanyahay, tusaalayaal badan buuna u keensaday si uu dadka ugu qanciyo in dib u fekerku faa'iidooyin badan wato.

Waxaa ka mid ah tusaalayaashaas uu soo qaatay sheeko dadka agtooda ka ah mid biya kama dhibcaan ah ama shaki aan la gelin, waxay leedahay sheekadu in haddii aad Rah ku rido biyo karaya uu si degdega uga fakanayo weelka biyaha kulul ay ku jireen, meesha haddii biyaha lagu riday si tartiiba loo siyaadiyo heer kulka aysan ka fakanayn maxaa yeelay jirkeeda baa kulka si la mida la qabsanaya is bedelada heer kulka; laakiin Grant wuu diiday isagoo yiri sheekadaan dib ugu feker haddii Rah lagu rido biyo karaya way murxaysaa wayna bakhtin, laakiin markii deegaanka ay ku noolayd uu noqon waayo mid raaxo leh bay carari kartaa, waana marka biyaha si tartiiba loo kordhiyo heer kulkooda.

Si kastaba ha ahaatee waxa uu tusaale ugu soo qaatay waxyaabaha la iska aamino iyaga oo aan la jirrabin ama dib loo fiirin.

Feker joogto ah

Islaamka dhexdiisa fekerku waa joogto, waana amar xagga Eebe ka yimi, taas oo u ekeysiinaysa in uu noqdo cibaado Eebe lagu caabudo, sida loo jeedona Quraanka ayaa marar badan ay ku soo aroortaa is-waydiinta ah (أفلا يتفكرون) mayaysan fekerayn.

Weedha ah mayeysan fekerayn waxay inoo sheegaysaa in fekerku uu yahay wax joogta ah oo aan kala go'in, waxaana lagu fekerayaa, wax tegey, wax jooga iyo wax soo socdaba, weedha aan soo sheegnay waxay si wayn ula xiriirtaa waxa soo socda maxaa yeelay falka Quraanku ku cabiray wuxuu si aada ula sii xiriiraa aayaha iyo waxa soo socda oo ay tahay in aad wax la isaga waydiiyo.

Quraanku si kale ayuu u dhigaa fekerka ama caqli ka shaqaynta oo (يعقلون) oo ah weelayn, taasina waa mid timaada markii feker la sameeyo wixii xog ahaa ama xikmad ahaana gadaal laga weelayo, sidoo kale weelayntu waxay la xiriirtaa ka faa'iidaysiga casharada ku duugan waxa la weelaynayo ama loo dhug yeelanayo, maxaa yeelay weelaynba ma jirayso iyadoo aan la hanan duruus laga dhishay waxyaabaha lagu fekeray.

Haddaan ka soo tagno labadaas eray, waxaa ilaa 18 jeer kusoo noqnoqday Quraanka erayga hore ee ah (يتفكرون) kulligoodna waa fal socda marka laga tago hal mar oo lagu cabiray fal tagto ah, waxaa sidoo kale Quraanka ku soo aroortay erayo kale oo badan sida (يعقلون والتدبر) iyo sifooyin dadka caqliga iyo fekerka u saaxiiba lagu tilmaamayo; tusaale ahaan erayga (أولى الألباب) bal aan kusoo aroorino qormadan dhowr aayadood oo is daba yaal oo kuu sheegaya in la fekero:

١. (إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ) الجاثية ١٣.

٢. (وَتِلْكَ الْأَمْثَالُ نَضْرِبُهَا لِلنَّاسِ وَمَا يَعْقِلُهَا إِلَّا الْعَالِمُونَ) العنكبوت ٤٣.

٣. (وَقَالُوا لَوْ كُنَّا نَسْمَعُ أَوْ نَعْقِلُ مَا كُنَّا فِي أَصْحَابِ السَّعِيرِ) الملك ١٠.

٤. (انْظُرْ كَيْفَ نُصَرِّفُ الْآيَاتِ لَعَلَّهُمْ يَفْقَهُونَ) الأنعام ٦٥.

٥. (يُقَلِّبُ اللَّهُ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَعِبْرَةً لِأُولِي الْأَبْصَارِ) النور ٤٤.

Dib u milicsi yar oo aad ku samayso aayadahaas oo dhan waxay kuu sheegaysaa dhacdooyin tagay oo ay tahay in si joogto ah loogu fekero si loogala soo baxo duruus nolosha soo socota, mid dhow iyo mid dheerba loo dheefsado.

Qofka Muslimka ah ayaa diinta Islaamku u qaabaysaa mid mar walba dhiifoon oo feker joogto ah ku jira, waxaana aad looga dayriyaa qofka dhoohan oo aan wax socda iyo wax dhacay war ka hayn, taasi miyaysan inoogu yeerayn in aan si cad dib ugu fikirno, oo maanka iyo maskaxdaba dib ugu celino ayaamo tegey iyo dhacdooyin aan si xeel dheer loo dhuuxin si aan u hubsano tubta aan hayno meeshay u socoto.

Sidoo kale sunnada suubanaha – nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee – ayaa saas oo kale ku baraarujiyey ummadiisa inay fiiriyaan caaqibada arimaha, kuna fekeraan oo aayaha odorosaan, markii la odorosayo arrima soo socdana waxaa lagu odorosaa fikirka oo dib loo celiyo iyadoo la adeegsanayo arrimo dhacay oo duruus lagala soo baxayo, taas waxaa kuu iftiiminaya hadalka saxaabiga Adardaa' ku eg ee ku leeyahay "saacad aad fekerto baa ka khayr badan habeen dhan oo aad salaad u taagantahay" shucab al iimaan – Bayhaqi – 1/136/118, ama kan uu leeyahay Cumar Qays Al-mulaa'i "waxaa isoo gaadhay in saacad aad fekerto ay ka wanaagsantahay xilli xilliyada ka mid ah oo aad shaqayso, waxaase kuwaas saxaabada qaar ka mida ay yiraahdeen inoo ka dhow ama inoo ka muhimsan in suubanuhu–naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee-inoo sheegay in aduunyada la inoo dhiibayo ka dib la fiirinayo fekerka aan ku maamulo iyo sida aan u dhaqano, bal fiiri weerahan soo socda ee afka carabiga aan u daayey:

عن أبي سعيد الخدري -رضي الله عنه- عن النبي -صلى الله عليه وسلم- قال: "إنَّ الدُّنيا حُلوةٌ خَضِرةٌ، وإنَّ اللهَ مُسْتخلِفُكم فيها فَيَنْظُر كيف تَعمَلون، فاتَّقوا الدُّنيا واتَّقوا النِّساءَ، فإنَّ أوَّلَ فتنةِ بني إسْرائيلَ كانتْ في النِّساءِ" رواه البخاري ومسلم.

Haddaba xadiiska iyo aayadaha iyo kan saxaabada ku egba waxay inoo sheegayaan inaan fekerno oo fiirino cirib-danbeedka arin kasta oo ina soo marta.

## TAARIIDHDA IYO FEKERKA

Taariikhyahanada ka faallooda falsafada taariikhda qaar ka mid ah waxay ku doodaan in samayska taariikhda ay sabab u tahay fikrado loolamaya ama is waydaaranaya oo mid markay daciifto aragti kale ama fikir kale la curinayo taas danbena ay taageerayaal helayso lana fulinayo, sida uu ku qoray Dr Jaasim suldaan kitaabkiisa yar ee faa'iidada badan ee la yiraahdo (فلسفة التاريخ – الفكر الإستراتيجي في فهم التاريخ) waxa uu kasoo guuriyey kitaabada uu qoray faylasuufka reer Jarmal ee la yiraahdo Hegel inuu qabay in taariikhdu ay tahay fikrad wayn oo hoosta ku wadata wixii burin lahaa; laakiin ay noolaanayso fikraddaasi mudo ilaa ay ka hoos baxdo fikrad kale oo ka duwan, taasoo noqonaysa mid horseedda horumar kale.

Wuxuu rumaysnaa sida uu Dr. Jaasim kasoo werinayo qolyo kale oo taariikhda daraaseeya in marxalad kasta taariikheeda si gooni ah loo daraaseeyo, maxaa yeelay afkaarta ay xanbaarsantahay baa ah mid marxaladdaas u gooni ah. Dr. jaasim – falsafada taariikhda 89 – 92.

Iskusoo wada dar arimahaas aan soo qaadannay oo waxay kulli cadaynayaan arrin aan muran ku jirin oo ah in fikirka ama dib u fiirinta arrimuhu ay tahay gun-dhiga guusha iyo ka dheehashada casharro lagu maamulo nolosha laguna hanto aayo suuban.

## SOOMAALIYA GAARIGA MARNA MA LA HOJIYEY

Dhamaan arimaha aan cuskannay ee qormada qaybteeda hore aan kusoo gudbinay, biya dheceedu waxa uu ahaa inaan is weydiinno annaga maxaa ina ka qaldan? Ma is weydiinnay weli xaggee inoola socdaa gaariga aan saarannahay? Maxay fikrad kasta ama hab maamul kasta muxuu inoo la ciirayaa inaga oo aan guulo la taaban karo gaarin? Ma inagaa cilladu mise waa nidaamyada aan ku dhaqayno dalkeenna?

Waxaa socon waayey hab-maamulkii madaniga ahaa, kii milatariga, kii qabaliga ahaa oo xataa beeluhu ay hormarin waayeen meelihii beelohoodu deganaayeen, dhowaan waxaa la qaatay hab-maamul federaal ah isagii baa maanta lugta lagu walaaqayaa oo aan marna kan gobol joogaa u joojinayn kan maamulka dhexe jooga, kan kan dhexe joogaana kan gobolka jooga uusan u joojinayn, waxay maraysaan in lagu kala faano ajnebiga loo kala shaqeeyo ama lala shaqaysto hadaan malaha xoogaa u wanaajinno.

Waxaas oo dal baylah ah iyo durriyaad badaha ku go'aaya, iyo badaha la jariifayo, ma in fekerku inagu yaryahay baa leh mise inaynaan si togan u fekerayn baa leh?

Si kastaba ha ahaatee waxaan ugu baaqayaa dhamaan midowyada raba inay wadankaan ku darsadaan hab-maamulkiisa wax aragti ah, gaar ahaan (midowga Haybad Qaran) inay curiyaan oo keenaan aragtiyo ka gadma muwaadinka Soomaaliyeed, laguna beddelo is jiid-jiidkaan iyo habqankaan aan hiraalka saxda ah hayn, tubta toosanna waydaarsan.

Jamhuuriyadu waxay rabtaa badbaado, in arrinkaas la sameeyana waa waajib diini ah intuusan noqon maslaxad bes; in kastoo diintuba maslaxad ilaalinteed ay u socoto ama u timi.


**W/Q:** Maxamed Nadif Maxamed (Showkaani)
Bare kulliyada shareecada ee jaamacada hormuud

E: m.showkaani@gmail.com.



# SIDA LOO DHISO BULSHO AWOOD LEH OO HORUMARSAN:

## ARAGTI, IYO CASHARRO CAALAMI AH



Dr. Maxamed Cali Faarax



# HORDHAC

Bulsho awood leh oo horumarsan waa mid ku dhisan aqoon, caddaalad, ka-qaybgal bulsho, iyo nidaam maamul oo hufan. Dunida casriga ah, horumarka bulshooyinka looma fahmo oo keliya koboc dhaqaale, balse waxa uu ku xiranyahay tayada nolosha, sinnaanta, xasilloonida, iyo awoodda bulshadu u leedahay inay si wadajir ah u xalliso caqabadaha horyaalla.

Maqaalkani waxa uu falanqaynayaa tiirarka asaaska u ah dhismaha bulsho awood leh, isaga oo adeegsanaya xog iyo tixraacyo cilmiyeed oo ku dhisan aragtiyo caalami ah.

# 1. MIDNIMADA UMMADEED

Midnimadu waa laf-dhabarta jiritaanka iyo horumarka bulshooyinka iyo tan Soomaalidaba. Taariikh ahaan, Soomaalidu waxay ku caan baxday wadajir, is-garabsi, iyo isku-tiirsanaan ku dhisan qiyamka Islaamka, dhaqanka iyo wadaagga af, diin iyo dhaqan. Markii midnimadu adkaato, bulshadu way xoogaysataa; marka ay daciifto, kala fogaansho iyo tabar-darro ayaa ka dhasha. Sidaas awgeed, dib-u-dhiska midnimada bulshada Soomaaliyeed waa waajib qaran oo u baahan wacyigelin, caddaalad, iyo ka-qaybgal bulsho oo loo dhanyahay, si loo xaqiijiyo nabad waarta, dowladnimo adkaysata, iyo mustaqbal ay wada leeyihiin dhammaan ummadda Soomaaliyeed.

Waxaa Soomaaliya maanta khatar ku jira madaxbannaanideedii iyo wadajirkeedii dhuleed; iyadoo Israa'iil ay Icitaaftay maamulka Somaliland, taasoo dhaawac wayn ku keentay midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed; waana tallaabo khilaafsan qawaaniinta iyo shuruucda adduunka u deggan. Waxay kaloo khatar ku tahay amniga gobolka iyo kan adduunkaba marka la eego goobta istiraatiijiga ah ee Somaliland dhacdo oo ah marin-badeedka Gacanka Cadmeed oo aan sidaas uga sii fogayn marinka muhiimka ah ee Baaba-al-mandab iyo Badda Cas.

# 2. WAXBARASHADU WAA AASAASKA BULSHO AWOOD LEH

Waxbarashadu waa tiirka ugu muhiimsan ee lagu dhiso bulsho is-haysata, wadajir u fikirta, kana jawaabta caqabadaha dhaqaale, siyaasadeed, iyo bulsho. Dalalka ka soo kabanaya colaadaha, sida Soomaaliya, waxbarashadu ma aha oo keliya aalad aqoon lagu gudbiyo, balse waa hab dib-u-dhis bulsho, nabadeyn, iyo dowlad-dhis. Daraasado badan ayaa muujinaya in bulshooyinka helay waxbarasho tayo leh ay yeeshaan isku-duubni, kalsooni bulsho (social trust), iyo awood ay ku xalliyaan khilaafaadka (UNESCO, 2015: Education for all).

Bulsho is-haysata waa mid xubnaheedu wadaagaan qiyam, ujeeddooyin, iyo dareen mas'uuliyadeed. Waxbarashadu waxay abuurtaa:

- Faham wadajir ah oo ku saabsan jinsiyadda, diinta, iyo dhaqanka
- Is-ixtiraam iyo dulqaad (tolerance)
- Hayb qaran (national identity)

Manhaj waxbarasho oo ku saleysan nabad, muwaadinnimo, iyo xuquuqda aadanaha ayaa hoos u dhiga kala qoqobka qabiilka iyo fikirka xagjirka ah. Soomaaliya gudaheeda, dugsiyada iyo jaamacaduhu waxay noqon karaan goobaha ugu muhiimsan ee lagu dhiso wacyiga qaran iyo wada-noolaanshaha (World Bank, 2018: Education and Fragility in Conflict-Affected States).

Waxbarashadu waxay kor u qaaddaa tayada shaqaalaha, hal-abuurka, iyo wax-soo-saarka. Bulsho waxbaratay:

- Waa ay firfircoon tahay dhaqaale ahaan
- Waxay leedahay xirfado ay kula tacaasho saboolnimada iyo shaqo la'aanta
- •Waxay yeelataa hoggaan aqoon ku dhisan

Aragtida Human Capital Theory waxay caddeyneysaa in maalgelinta waxbarashada ay keento koboc dhaqaale waara (Becker, 1993). Soomaaliya, oo inta badan bulshadu ay yihiin dhallinyaro, waxbarashadu waa furaha ka hortagga tahriibka iyo ku biirista kooxaha hubeysan.

# 3. MAAMUL WANAAG IYO HAY'ADO ADAG

Maamul-wanaagga iyo hay'adaha awoodda leh waa laf-dhabarta dhismaha bulsho horumarsan oo xasilloon. Qaramada Midoobay waxay ku qeexday maamul-wanaag inuu yahay habka loo maamulo awoodda, kheyraadka, iyo go'aan-

qaadashada si hufan, caddaalad ah, isla markaana lala xisaabtami karo (UNDP, 2011: Governance Principles, Institutional Capacity and Quality). Bulsho kasta oo doonaysa horumar waara iyo isku-duubni bulsho (social cohesion) waa inay leedahay hay'ado dowladeed iyo kuwo rayid ah oo awood u leh fulinta sharciyada, bixinta adeegyada, iyo ilaalinta xuquuqda muwaadiniinta.

Hay'adaha awoodda leh (strong institutions) waxay hubiyaan in awoodda siyaasadeed aysan ku ururin shaqsiyaad ama kooxo gaar ah. Taasi waxay:

- Yareysaa khilaafaadka siyaasadeed
- Ka hortagtaa rabshadaha
- Xoojisaa kala dambeynta sharciga

Acemoglu & Robinson (2012: Why Nations Fail) waxay ku doodeen in dalalka horumaray ay wadaagaan hal sifo oo muhiim ah: hay'ado loo wada dhan yahay (inclusive institutions), kuwaas oo awoodda iyo kheyraadka si caddaalad ah u qaybiya.

Maamul-wanaaggu waa shardi lama huraan u ah horumar dhaqaale. Hay'ado daciif ah waxay horseedaan: Musuqmaasuq, maalgashi la'aan iyo sinnaan la'aan dhaqaale.

Bangiga Adduunka (World Bank, 2020: Worldwide Governance Indicators) wuxuu caddeeyay in tayada hay'aduhu si toos ah ula xiriirto heerka dakhliga qofka (GDP per capita). Soomaaliya, xoojinta hay'adaha maaliyadeed, canshuuraha, iyo kormeerka waxay gacan ka geysan karaan koboc dhaqaale oo loo wada dhanyahay.

Hay'adaha caddaaladda, amniga, iyo adeegyada bulshada marka ay si siman u shaqeeyaan, waxay yareeyaan caddaalad-darrooyinka, xoojiyaan dareenka muwaadinnimo, sidoo kalena ka hortagaan ku takrifalka awoodda.

UNESCO (2020: Social Cohesion and Institution Building) waxay muujisay in sinnaan la'aanta hay'adaha ay si toos ah u dhaawacdo wada-noolaanshaha bulshada. Soomaaliya, hay'ado u shaqeeya dhammaan muwaadiniinta iyada oo aan loo eegin qabiil ama deegaan, waa furaha bulsho is-haysata.

## 4. CADDAALAD BULSHO IYO SINNAAN

Caddaaladda bulsho iyo sinnaantu waa tiirarka aasaasiga ah ee dhismaha bulsho is-haysata, xasilloon, isla markaana horumar waara gaarta. Caddaalad bulsho waxay tilmaamaysaa in dhammaan xubnaha bulshada ay helaan fursado, xuquuq, iyo adeegyo si caddaalad ah loo qaybiyey, halka sinnaantu ay diiradda saarto yareynta farqiga u dhexeeya kooxaha kala duwan (Rawls, 1971: A Theory of Justice). Bulsho kasta oo ay ka jirto cadaalad-darro iyo sinnaan la'aan joogto ah, waxay u nugushahay khilaaf, kalsooni darro, iyo burbur bulsho.

Bulsho is-haysata waa bulsho ay xubnaheedu dareemaan in ay si siman uga tirsanyihiin nidaamka bulsho iyo midka dowladnimo. Marka caddaaladdu jirto:

- Dadku waxay yeeshaan dareen ka-qaybgal iyo lahaansho (sense of belonging)
- Waxaa yaraada takoorka, qabyaaladda, iyo kala-qoqobka
- Waxaa kordha kalsoonida bulshada dhexdeeda

OECD (2012: Perspectives on Global Development: Social Cohesion in a Shifting World) waxay caddeysay in sinnaanta iyo caddaaladda bulsho ay si toos ah u xoojiyaan wada-noolaanshaha bulshada. Soomaaliya, halkaas oo khilaafaad qabiil iyo mid deegaan ay taariikh dheer leeyihiin, caddaalad bulsho ayaa ah furaha dib-u-dhiska kalsoonida bulshada.

Daraasado badan ayaa muujinaya in sinnaan la'aanta dhaqaale iyo bulsho ay si weyn ula xiriirto colaadaha hubeysan (Stewart, 2008: Horizontal Inequalities and Conflict). Marka kooxo gaar ah laga reebo: khayraadka, fursadaha waxbarasho iyo shaqo iy go'aan-qaadashada siyaasadeed, waxay abuurtaa dareen tabasho (grievance) keena rabshado iyo burbur bulsho. Sinnaanta fursadaha (equity of opportunity) waxay yaraysaa sababaha keena kacdoonka iyo colaadaha. Soomaaliya, sinaan darrada u dhexeysa magaalooyinka iyo miyiga, ama kooxaha kala duwan, waxay sii hurisaa nuglaanta amni, taasoo ay ka dhalato xasarado iyo colaado horseeda xasillooni darro siyaasadeed oo dalka khal-khal geliya.

# 5. DHAQAALE WAARA IYO SHAQO ABUUR

Dhaqaale waara iyo shaqo-abuurku waa tiirarka ugu muhiimsan ee lagu dhiso bulsho awood leh oo xasilloon. Dhaqaale waara (sustainable economic development) wuxuu diiradda saaraa koboc dhaqaale oo daboolaya baahida jiilka maanta, isla markaana aan waxyeelleyn awoodda jiilasha mustaqbalka (Brundtland Report, 1987: Our Common Future). Shaqo-abuurkuna waa habka ugu wax-ku-oolsan ee lagu xaqiijin karo ka-qaybgal bulsho, yareynta saboolnimada, iyo xoojinta wada-noolaanshaha bulshada.

Bulsho dhaqaalaheedu xasilloon yahay waxaa ku yaraada saboolnimada iyo ku-tiirsanaanta gargaarka dibadda, dembiyada iyo rabshadaha ayaa hoos u dhaca, waxaana kordha kalsoonida bulshada iyo hay'adaha dowliga ah.

World Bank (2019: Jobs and Social Cohesion in Fragile States) waxay caddeysay in koboca dhaqaale ee loo wada dhanyahay (inclusive growth) uu si toos ah u xoojiyo is-haysashada bulshada. Soomaaliya oo saboolnimo baahsan iyo dhaqaale aan rasmi ahayn ay ka jiraan, dhaqaale waara waa furaha nabad waarta.

Shaqo la'aanta, gaar ahaan tan dhallinyarada, waxay si weyn ula xiriirtaa khilaaf, tahriib, iyo ku biirista kooxaha hubeysan. Sida ay muujisay ILO (2016: Global Employment Trends for Youth):

- Dhallinyaro shaqo la'aan ah waxay u nugul yihiin rabshad
- Shaqo abuurku wuxuu yareeyaa dareenka tabashada (grievance)
- Shaqo la helaa waxay xoojisaa mas'uuliyadda muwaadinnimo

Soomaaliya oo in ka badan 70% dadku ay ka hooseeyaan 30-sano, shaqo-abuur ballaaran ayaa muhiim u ah badbaadinta mustaqbalka qaranka.

# GUNAANAD

Dhismaha bulsho awood leh oo horumarsan waa hawl u baahan aragti fog, hoggaan wax ku ool ah, iyo ka-qaybgal bulsho oo ballaaran. Waxbarashada, maamul wanaagga, cadaaladda, dhaqaale waara, iyo kalsoonida bulsho ayaa ah tiirarka lama huraanka u ah horumarka. Haddii bulshooyinku si nidaamsan u xoojiyaan qodobadan, waxay gaari karaan horumar waara iyo xasillooni dhab ah.

**Tixraacyo (References)**



- UNESCO. (2015). Education for All 2000–2015: Achievements and Challenges.
- World Bank. (2018). Education and Fragility in Conflict-Affected States.
- UNDP. (2011). Governance Principles, Institutional Capacity and Quality.
- Acemoglu, D., & Robinson, J. A. (2012). Why Nations Fail: The Origins of Power, Prosperity, and Poverty. Crown Publishers.
- World Bank. (2020). Worldwide Governance Indicators.
- UNESCO. (2020). Social Cohesion and Institution Building.
- Rawls, J. (1971). A Theory of Justice. Harvard University Press.
- OECD. (2012). Perspectives on Global Development: Social Cohesion in a Shifting World.
- Stewart, F. (2008). Horizontal Inequalities and Conflict. Palgrave Macmillan.
- Brundtland Commission. (1987). Our Common Future. Oxford University Press.
- World Bank. (2019). Jobs and Social Cohesion in Fragile States.
- ILO. (2016). Global Employment Trends for Youth.


**W/Q:** Dr Maxamed Cali Faarax

# XILKU WAA KU DHIBAYAA!



Maxamuud Cali Aadan (Hoorri)



Xigashada Sawirka: AI

*“Nin baa laga sheegay dadku waxa ay naannays iiga dhigeen magac yaab leh—magacaasi waa “Dembi soconaya” waase lay qariyaa!*

Xilku waa ku dhibayaa oo dhab, waana gar inuu ku dhibo oo waxa aad ku hafatay mowjadaha iyo maayadaha hoggaaminta. Xilku waa ku dhibayaa oo hubaal, waana wax lagaaga fadhiyey inaad ku habowdo ayda iyo owra-daaqeenkaba. Xilku waxa uu dhib ku yahay qof kasta gorodda loo suray culays ka weyn—maansadani waxa ay curatay hilaaddii 11-11-2011— Waxa aan kaga hadlayaa dhibaatada ka muuqata maamullada Soomaalida iyo hagardaamada joogtada ah ee ay ku hayaan dadkooda iyo naftoodaba.

Waxa aan ognahay in uu yahay xilku wax adag, oo u baahan: caqli iyo cilmi, garasho iyo gudasho, tab iyo taag, talo iyo tusaalayn. Dhibka ugu weyn ee ka jira dalka qofba dhinac ayuu ka cabbiray! Mar waxa aad maqalaysaa “Soomaaliya, waxa godka ku ridey gaarsiiyey odayaasha koofiyadaha iska dhookeeyey”. Mar kale, waxa aad maqlaysaa ‘Soomaaliya, waxa uubta ku ridey siyaasi danayste ah, dullaal afarjeeb leh, wadaad wareeray, IWM”. Dadka qaar ayaa ku sheekeeya mararka qaar “Soomaaliya waxa gujo iyo tantoobaba isku daray shisheeye ku soo duuley, waxa birta mariyey dhoohane dheef raadis ah”.

Soomaaliya, waa waddan ama dal leh khayraad kala duwan sida; xoolo, beero, kalluun iyo macdan ciidda iyo carradaba ka badan dadku waa ka baahanyahay. Soomaaliya, waxa ka jira cudurro xun oo dilaa ah waxana ka mid ah; xanuunka eexda, aafada dulimiga, hagardaamada, xad-gudubka, nin-jeclaysiga iyo dhabar-k- taabashada.

Marka aad tahay qofka aad tahay! In qof kale kugu sheego waxaadan ahayn sow yaab iyo amakaag maahan? Garashadu waa sahayda ugu weyn ee qof lagu kuunyi karo, maantase waxa tilmaan iyo summadba u ah mxuu dhistay? Muxuu dhaqday? Muxuu boobay? Muxuu leexsaday? Muxuu dullaaley? Xaggee buu kiraystay? Horaa loo yidhi “af nooli hadal ma daayee”, waxase weydiini ka taagan tahay 15 sano ka hor wixii aan dareemayey ama iiba muuqdey ayaa weli na hortaagan.

*Xaajada adduunyadu*
*Xilligii la joogoba*
*Waa xowsad gaaroo*
*Xukumada dhacaayaa*
*Xaraf Eebbe weeyee*
*Ninba xeeladdiisuu*
*Xaajada ka doonaa.*

*Xilliyada guddonkiyo*
*Uu xifaaltan joogona*
*Ama xaajo murugtee*
*Ninba xeeladiisuu*
*Xaajada ka doonaa.*

*Xumaan baan la daynayn*
*Xurmad baan la dhowrayn*
*Xushmad baan la siinayn*
*Xurguf baan la daminayn*
*Xasad baa la xiisayn*
*Xanta waa la dhaqan gelin.*

*Xilka waa la suurayn*
*Xaajada nimaan garan*
*Ama xarig ku xirankarin*
*Ama xarigga xirikarin*
*Xumaan aan ka caagnayn*
*Xilka waa u dhiibnaa*
*Xikmad waa ka doonaa*
*Waa xaal adduunyee*
*Ninba xeeladiisuu*
*Xaajada ka doonaa.*

*Boholaha xarggan baan*
*Xalay reerka geeyoo*
*Xero reerka uga dhigay*
*Xaajadu waxay tahay*
*Maqashiyo xayeeshidu*
*Xagarada ma daaqaan*
*Xaska guriga yaalliyo*
*Xaab key abaabaan.*

*Anna xoorka sare iyo*
*Meel xagari ay taal*
*Baan adhiga xuliyaa*
*Waa xaal adduunyee*
*Ninba xeeladiisuu*
*Xaajada ka doonaa...*

*Xukumada dhacaayana*
*Waa xarafka Eebbee*
*Xaaji been ma sheegaa?*
*Xigtadiis ma diidaa?*
*Xaqa belo ma siistaa?*
*Xoloddada ma huriyaa?*
*Xanannada ma daadshaa?*
*Xaaraan ma quutaa?*
*Xawadii ma waayaa?*
*Waa xaal adduunyee*
*Ninba xeeladiisuu*
*Xaajada ka doonaa.*

**W/Q:** Maxamuud Cali Aadan
(Hoorri)































**Website**: https://maragnews.com/

**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG